

WARBIXINTA XUQUUQDA AADANAHA EE SOOMAALIYA 2016

DULMAR KOOBAN

Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, oo la dhisay 2012kii, waxaa hogaaminayey Madaxweyne Xasan Sheekh Maxamuud. Odayaasha qabaaa'iladu waxa ay magaacbeen xubnaha Golasha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka ah intii lagu jiray 2012, baarlamaanka ayaa u doortay Xasan Sheekh Maxamuud madaxweynenimo dhamaadkii sanadkaas. Madaxweynihii here ee Dawladdii Ku Meel Gaarka Aheyd (TFG) Shiikh Shariif ahaana masharax madaxweyne ayaa codeynta madaxweynenimo ku tilmaamay mid cadaalad u dhacday waxa uuna aqbalay in lagaga adkaaday. Doorashooyinkii aan tooska aheyn ee aqalka hoose ee baarlamaanka, aqalka sare ee cusub iyo doorshada madaxweynaha ee la qorsheeyay Agoosto iyo Sebteember, lama dhameystirin dhamaadkii sanadka Dowlada jamhuuriyada iskeed isu magacaawday ee Somaliland ee waqooyi galbeed iyo dowlad goboleedka Puntland ee waqooyi bari waxa ay gacant ku haayeen dhulalka hoos taga mid walba. Maamulka ku Meel gaarka ah ee Galmudug (MKG), Maamulka Ku meel Gaarka ah ee Jubba(MKJ), iyo Maamulka Ku Meelgaarka ah ee Koofur Galbeen(MKKG) si buuxda gacanta uguma heyn dhulalka hoos taga. Ururka argagixisada ah ee al-Shabaab waxa ay sii wateen gacan ku heynta Dooxada Wabiga Juba waxa ayna sii wadeen in ay si xor ah u sii wataan howlgaladooda meelo badan oo ka mid ah qeybaha koofureed iyo dhexe ee dalka. Isku dhacyada intii uu sanadku socday ee ay ku lug lahaayeen maleeshiyaadka dowladu, Howlgalka Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) iyo al-Shabssb ayaa keenay dhimashada, dhaawaca iyo baro kicinta dad rayid ah. AMISOM iyo ciidanka amaanka ee Soomaaliya ma aanay sameyn howlgal weyn oo ku xoreynayaan goobo dheeraad ah intii lagu jiray sanadka.

Maamulada rayidka ahi ma ayan sii wadin gacan ku heyn wax ku ool ah ee xoogagga amaanka.

Xadgudubyada kale ee waaweyn ee xuquuqda aadanaha waxaa ka mid ahaa dilalka dadka rayidka ah ay u geeysteen Xoogagga amaanka ee Soomaaliya, al- Shabaab iyo qowleysato aan la aqoon. Rabshadaha iyo takoorka ka dhanka ah haweenka iyo gabdhaha oo ay ku jiraan kufsi, gudniinka fircooniga ah /gooynta (FGM/C) waxa ay ahaayeen kuwo aad u baahsan. Rayidku ma aanay haysan awooday ku badalaan dowladooda iyaga oo u maraaya doorasho xor iyo xaq ah.

Xadgudubyada kale ee waaweyn ee xuquuqda aadanaha waxaa ka mid ah dad la waayo, jirdil iyo habab kale oo arxan daro ah, ka baxsan binaadamnimada , si bahdil ah oo loola dhaqmay ama ciqaabay; xaalad adag oo khatar galinaysa nafta oo ka jirtay xabsiyada; xarig aan loo meeldayin iyo xiritaano siyaasad ka dambeeyso iyo qabasho ; diiditaanka dhageysi dacwadaha si furan oo cadaalad ah, isticmaalka caruur la askareeyay, xayiraad lagu soo rogo xoriyadda hadalka iyo saxaafadda, isu imaatinka iyo ururada , diinta, iyo dhaqdhaqaaqa, dad guryahooda xoog looga saaray iyo dib u dajin dadka soo barakacay (IDPs) , arbushaad, leexsasho iyo qabsashada gargaarka bini aadinimada , musuqmaasuq, tahriibinta dadka, xadgudub iyo faquuq loo geysto qabiilada laga tirada badan yahay iyo dadka naafada ah, bulshada oo lagu ceebeeyo shaqsiyaadka ah haweenka isu galmooda, ragga isu galmooda, qofka u galmooda ragga iyo haweenka , nimoow naageedka, iyo kuwa aan ragga iyo haweenka ah (LGTBs), xuquuqda shaqaaalaha oo la xadiday, ku shaqeeysi khasab ah , oo ay ku jiraan caruur.

Guud ahaan ka sareeynta sharcigu waxa ay noqotay wax caadi ah. Dawladdu waxay ay ka qaaday talaabooyin yar si dacwad loogu soo oogo loona ciqaabo saraakiisha geysata tacadiyadaka, gaar ahaan saraakiisha gaashaandhigga iyo booliiska ee lagu soo eedeeyay in ay geeysteen kufsi, dil, rabshadaha qabaa'ilada iyo in ay baad ka qaadaan shacabka.

Maleeshiyada qabiilada iyo Al-Shabaab waxa ay sii wadeen in ay ka geystaan xadgudubyo arxandaro ah waddanka oo dhan, oo ay ka mid yihiin dil aan sharci soo marin, dilal siyaasadeeysan, dad la waayo, iyo ciqaab aan caadi aheyn oo naxariis daro ah, kufsi : iyo weeraro loogeystay shaqaalaha hay'adaha aan dowliga aheyn (NGOs), Qaramada Midoobay iyo howlgalada dibolomaasiyiinta, waxaa kale oo ay xayireen kaalamada bini'aadinimo, u qorteen caruur askar, iyo xakameeynta xoriyada hadalka, saxaafada, isu soo baxyada iyo dhaqadhaqaaqyada.

Ciidamada AMISOM waxa ay dileen dad rayid ah iyaga oo geystay xadgudub dhinaca galmoodka ah iyo dhiigmiirad, oo ay ku jireen kufsi loo geystay dumarka iyo gabdhaha(fiiri qeybta 1.g.).

Qeybta 1aad. Ixtiraam Sharafka Qofka, Oo Ay Ka Mid Tahay in uu xor ka ahaado :

a. Iyada oo aan loo meel dayin oo nolol loo diido iyo dilalka kale ee sharci

darada ah ama siyaasadeeysan.

Ciidamada dawladda iyo maleeshiyada raacsan, dad kale oo xiran dharka ciidamada, ciidamada nabadgelyada ee gobolada, al-Shabaab iyo kooxo hubeysan oo aan heybtood aan la garaneyn ayaa geystay dilal aan loo meel dayin ama sharci daro ah. Dawladda iyo maamul goboleedyada waxa ay dilaan dadka iyada oo aan la amrsiin habka cadaalada siman. Iska hor imaadyo hubeysan iyo weeraro ayaa lagu dilay dad shacab ah iyo shaqaalaha gargaarka (eeg qeybta 1.g) ka sareynta shacrigu waxa ay noqotay caado.

Ciidamada federaalka iyo kuwa gobaladu waxa ay dileen dibad baxayaal. Tusaale ahaan bisha Maarso 26keedii boliiska ayaa rasaas ku riday dad shacab ah oo ka mudaharaadayay habka qaab dhismeedka maamul goboleedka Hiiraan iyo Shebeelada dhexe gudaha Baladweyne, iyaga oo dilay hal qof oo rayid ah, dhaawacayna afar kale. Gudaha Puntland iyo Somaliland gobolada lagu muransanyahay ee Sool iyo Sanaag, ciidamada amaanku waxa ay u isticmaaleen awood xad-dhaaf ah dadka degaanka ee ka soo horjeestay dadaaladii diiwaan galinta codbixiyayaasha intii lagu jiray sanadka. Isticmaalka xoogga ayaa keenay ugu yaraan dhimashada 10 iyo dhaawaca tiro intaa kabadan.

18kii Abriil , iyo maalihii xigay isku dhacyo qabiil, hooyo iyo lix caruur ah oo ay dhashay ayaa la dilay markii ciidamadu ay gubeen gurigooda oo ku yaalay gudaha tuulo u dhow magaalada Marka, Gobolka Shabeelada Hoose.

Intii lagu jiray Janaayo, 2015 waxaa la soo wariyay in ciidamada dowladu ay toogteen taageerayaasha Ahlu Sunna Wal Jamaca (ASWJ) oo banaanbax rabshado wata oo looga soo horjeedo dowlada ka dhigaayay Galhareeri , ee gobolka Galgaduud; laba qof ayaa ku dhimatay kuwa kalana waa lagu dhaawacay. Intii lagu jiray sanadka kiiskan waxaa xaliyay odayaasha oo gacan ka helayay saraakiil ka tirsan DFS; warbixin intaa dhaafsana lama helin.

Maxkamadaha ciidamadu waxa ay sii wadeen in ay qaadaan kiisas dacwo oo sharci ahaan ka baxsan awoodooda iyo hab dacwad qaadis oo ka hooseeyay heerarka caalamiga ah. Masuuliyiinta federaalka iyo kuwa maamul goboleedyadu waxa ay mararka qaar ku fuliyaan xukunada dilka ah ee kuwa lagu xukumo dilka maalmo gudahood marka xukunka lagu rido, gaar ahaan kiisaska eedeysanayaashu ay si toos ah uga qirtaan maxkamadda horteeda in ay xubin ka ahaayeen al-Shabaab ama fiidiyoow laga sii daayay telefishinka. Tirooyinka heer qaran ee dadka lugu filiyay xukunada dilka ah waxa ay ahaayeen kuwo aan lagu tiirsanaan karin. Laakiin

Howgalka QM ee Soomaaliya (UNSOM) ay dabagalay 20 dil wadanka oo dhan intii lagu jiray sanadka, oo ay ku jireen afar lagu soo eedeeyay in ay xubin ka ahaayeen al-Shabaab, 11 xubno ka ahaa ciidamada qalabka sida, iyo shan rayid ah. Hay'adaha xuquuqul insaanku waxa ay su'aal ka keeneen awooda maxkamada militarigu u leedahay in ay si haboon u ilaaliyaan arimaha ku saabsan garsoor cadaalad ah, xaqa in la raadsado cafis, ama xukunka oo la soo gaabiyo iyo sidoo kale in xukunka loo fuliyo hab waafaqsan heeraka caalamiga ah.

Dagaalo u dhexeeya qabiilada iyo jilibiyada, gaar ahaan kuwa ku saleysan biyaha iyo kheyraadka dhulka ayaa dhacay sanadka oo dhan, gaar ahaan Marka, Gaalkacyo iyo Gobolka Hiiraan (fiiri qeybta 6). Waxaa dhacay dilal aargoosi ah.

Al-Shabaab waxa ay sii waday in ay disho dad rayid ah (fiiri qeybaha 1.g. iyo 6). Dilalka waxaa ku jiray dilal ay al-Shabaab u geysatay dad ay ku eedeysay in ay u basaasayeen lana shaqeynayeen DFS, ciidamada qaranka Soomaaliyeed, iyo maleeshiyaadka ay is bahaaystaan.

Sidoo kale waxaa la soo wariyay in al-Shabaab ay dileen suxufiyiin. Tusaale ahaan, 5tii Juun niman dableey ah oo lagu tuhumay in ay ka tirsan yihiin al-Shabaab ay toogtay oo dilay haweeney saxafiyad aheyd oo u sheeqeeynaysay idaacada ay maamusho dowladu ee Raadiyo Muqdishu.

Rag hubeysan oo aan heeybtooda la aqoon ayaa u geystay dilal aan loo ciqaabin dad ay ku jireen xubno ka tirsan baarlamaanka, garsoorayaal, saraakiisha Heyadda Wardoonka iyo Amaanka Qaranka (NISA), askarta Ciidamada Qaranka Soomaaliyeed (SNA), iyo saraakiil kale oo dowladeed, sidoo kale suxufiyiinta, oday dhaqameedyada, iyo shaqaalaha ururada caalamiga ah.

8dii Juun, gudaha magaalada Gaalkacyo nin dableey ah oo aan heeybtiisa la aqoonsan ayaa toogtay oo dilay Dhudi Yusuf Adan, oo aheyd qof u ololeysa nabada heer gobol iyo madaxa Ururka Haweenka ee Mudug. Al-Shabaab ayaa sheegatay masuuliyada. Wax baaritaan ah laguma sameeyn.

Shil kaa ka baxsan 27kii Sebtember, nin dableey ah oo aan la aqoon ayaa ku dilay Muqdisho Cabdicasiis Maxamed Ali, Suxufi la shaqeynayay Raadiyo Shabeele.

b. Dad La Waayay.

Ma jirin warbixino ku saabsan in masuuliinta dowladu ay ka dambeeyeen dad la waayay oo ay siyaasadi ka dambeysay ama kuwa siyaabo kale loo waayay. Al-Shabaab waxa ay sii waday afduubka dadka oo ay ku jireen shaqaalaha gargaarku. Burcad badeedkuna waxa ay sii wadeen heeysashada dad ay afduubteen sanadihii la soo dhaafay.

14 kaluumeysato Iiraaniyiin ah oo 2015kii ay Al-Shabaab ka afduubteen biyaha Soomaaliya ee u dhaw Ceel Dheer, Gobolka Galgaduud ayaa la sii daayay intii lagu jiray sanadka.

Si ka duwan sanadihii hore, lama soo sheegin wax burcad badeednimo ah. Shaqaalaha iyo markab laga lahaa Bakistaan, Dooni wadatay calanka Iraan oo ay afduubeen rag hubeysan Nofember 2015 ayaa la sii daayay intii lagu jiray sanadka. 23kii Oktoobar, 26 shaqaalaha Naham 3, oo la qabtay 2012kii ayaa la sii daayay.

c. Jir Dilka Iyo Arxandarooyin kale, Si Ka Baxsan Bini'aadminimada, Bahdil loola dhaqmo iyo Ciqaab

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucayaa jir dilka iyo dadka oo si bini'aadminimada ka baxsan loola dhaqmo. Hase yeeshee, jir dilka, iyo arxandarooyinka kale oo ka baxsan bini aadminimada, bahdil lagu dhaqmo iyo ciqaabo ayaa dhacay. Gudiga QM ee la Socoshada Soomaaliya iyo Eritariya (SEMG) waxa ay sheegen in ay soo gaareen eedaymo ku saabsan in saraakiisha NISA ay geystaan jir dil. Ciidamadda dawladda, maleeshiyo raacsan, rag xiran dharka ciidamada, iyo ciidamada AMISOM ayaa geeystay rabshado galmo oo uu ku jiro kufsi (eeg qeybta 1.g).

Masuuliyiinta federaalka iyo maamul goboleedyada ayaa isticmaalay awood xad-dhaaf oo looga soo horjeedo suxufiyiinta, dibad baxayaal, iyo maxaabiis, taasoo sababtay dhimasho iyo dhaawac.

Saraakiisha NISA waxa ay si joogta ah u qaadeen baaritaano xagga aminga oo waaweyn, inkastoo aysan haysan awood sharciyeed oo ay wax xiraan ama ku hayaan. NISA waxa ay hayeen dadka ay qabteen muda aad u dheer iyadoo aan la marsiin habka cadalada iyo waxa ayna si xun ula dhaqmeen dadka la tuhunsanyahay intii su'aalaha la weydiinayay.

Al-Shabaab waxa ay ku soo rogeen ciqaab adag dadka ku nool dhulalka ay gacanta

ku haayeen (fiiri qeybta 1.a. iyo 1.g.).

Colaadhaha qabiilada ayaa mararka qaar sababa dhimasha iyo dhaawaca dad rayid ah (fiiri qeybta 1.g iyo 6).

Xaaladda Xabsiyada Iyo Goobaha Dadka Lagu Hayo

Xaaladda xabsiyadu qeybaha ugu badan ee dalka waxa ay aheyd mid adag iyada oo ay ugu wacneyd nadaafada iyo fayadhowrka oo liitay, biyaha iyo cuntada oo aan habooneeyn, iyo daryeel caafimaad la'aan. Xaaladuhu sidaa way ka wanaagsanaayeen gudaha Xabsiga Dhexe ee Muqdish, laakiin, dhibaataadu waxa ay aheyd buux dhaaf. Laba xarumood oo cusub—Xabsiga Garoowe ee Puntland (oo la dhameystiray 2014tii) iyo Xabsiga Hargeysa ee Soomaliland (oo la dhameystiray 2011kii) waxa ay gaarsiisnaayeen heerarka caalamiga ah waxaana la soo wariyay in si fiican loo maamulay. Xabsiyada ku yaalay dhulalka ay maamulayeen al-Shabaabiyo meelaha kale ee aan sahal lagu gaari karin oo ay masuuliyiinta dhaqanku gacanta ku hayeen waxa ay ahaayeen meelo aanay tagi karin kormeerayaasha caalamiga ah. Xaalada xabsiyada ee meelaha noocaas ah waxaa la aaminsanyahay in ay tahay mid adag, mararka qaarna halis ku ah nololaha.

Xaalada Nololeed : Buuxdhaafinta xabsiyada magaaloooyinka ayaa dhacda —gaar ahaan ka dib dhacdooyin xagga amniga ah ee waaweyn oo keena xiritaan. Masuuliyiintu waxa ay mararka qaar meel ku wada hayaan da'yarta iyo dadka waaweyn, sabab ay qeyb ka tahay iyada oo la aaminsanyahay in da'yartu ay ka amaan qab badanyihiin marka lala haayo xubno ka tirsan jilibkooda hoose. Masuuliyiinta xabsiyadu inta badan ma ayan kala saarin maxaabiista sugaya in dacwadooda la qaado iyo maxaabiista la xukumay, gaar ahaan gobolada koofurta iyo kuwa dhexe.

Kaliya maxaabiista Xabsiga Dhexe ee Muqdisho, Xabsiga Garoowe iyo Xabsiga Hargeysa ayaa maalin walba heli karay qubeys, xarun fayadhowr, cunto iyo biyo haboon, iyo banaaka oo ay ku jimicsadaan. Masuuliyiinta gobolada qaar, si kastaba ha ahaatee, waxa ay sanadihii dhawaa ka sameeyeen horumarin yara fiican meelaha, iyaga oo gacan ka helaya ururo caalami ah. Inta badan maxaabiista ku jirta xabsiyadu waxa ay ku tiirsanaayeen qoysaskooda iyo qabiiladooda si loo kabo irsaqooda, biyo iyo cunto. Da'yarta oo la xabiso marka ay codsadaan qoysaskooda oo doonayo in ilmahooda la edbiyo ayaa aheyd dhibaato, gaar ahaan Puntland and Somaliland. Arintaa iyada ah waxa ay ku dhacdaa sida badan caruurta qurbo joogta, kuwaas oo qoysaskoodu ay lacag siiyaan masuuliyiinta xabsiyada si ay u

hayaan caruurtooda qaba dhibaataada isticmaalka maandooriyayaasha si loogu dhaqan celiyo iyada oo ugu wacan tahay maqnaashaha qaabab kale oo lagu daaweeyo.

Masuuliyiintu waxa ay inta badan ka rabeen qoysaska maxaabiista in ay bixiyaan kharajka adeegyada caafimaad, maxaabiista aan la heyn qoysas ama qabiil kaalmeeya waxa ay heleen daryeel kooban oo adeegya noocaas ah. Dilaaca cudurada, sida qaaxada iyo daacuunka ayaa sii socday, gaar ahaan gudaha xabsiyada buux dhaasan sida Muqdisho. Dilaaca cudurada noocaas ah waxa uu halis galin karaa nafta mudada xili roobaadka.

Dismaha xabsigu waxa ahaa inta mid badan burbursan, ilaalada aan la tababarin ma aanay awoodin in ay sugaan amaanka.

Lama helin warbixin ku saabsan heerka dhimashada ee maxaabiista iyo xarumaha lagu hayo dadka maxkamad sugayaasha ah.

Al-shabaab waxa ay ku xirtay maxaabiis dhulalka ay gacanta ku heyso ee koofurta iyo gobolada dhexe. Maxaabiista waxaa lagu xabisay xaalada ka baxsan binu aadaminimada marka loo fiiriyo 'xadgudubyada' fudud ee ay geeysteen sida cabida sigaarka, ku haysashada waxyaalo mamnuuca ah telefoonada gacanta, dhageeysiga muusikada, daawashada iyo ciyaarta kubadda cagta, xirashada rajabeetada iyo xirasho la'aanta xijaabka.

Maamulka: Marka laga reebo Xabsiyada Dhexe ee Muqdisho, Garoowe iyo Hargeysa kuwaas oo la socda maxaabiista iyo xaaladooda, diiwaanadu guud ahaan ma aha kuwa haboon, sida badan xabsiyadu ma ay laheyn saraakiil soo baarta cabashooyinka.

Sharciga dawladda dhexe si cad uguma ogola in maxaabiistu cabashooda u gubiyaan masuuliyiinta garsoorka iyada oo aan faafreeb lagu sameyn, si kastaba ha ahaateen sharciga Somaliland, waxa uu u ogolaadaa maxaabiista in ay cabashadooda usoo gudbiyaan maamulada garsooska iyada oo aan laga sameyn faafreeb. Waxaa la sheegay in maxaabiistu ay soo gudbiyeen cabashooyin noocaas ah.

Maxaabiista xabsiyada dhexe ee Muqdisho, Garoowe iyo Hargeysa waxa ay u fursado haboon u lahaayeen dadka soo booqanaayay iyo in ay ku dhaqmaan diintooda, koobnaanta kaabayaasha ee xabsiyada kale ee dalka oo dhan ayaa xanibtay dhaqdhaqaaqyada noocaas ah. Maxaabiis badan ayaa ku tiirsanaa dadka

soo booqda in ay siiyaan raashin kab ah iyo biyo.

La socosho madaxbanaan : Masuuliyiinta Somaliland iyo masuuliyiinta dowlada ee Puntland iyo Muqdisho ayaa ogolaaday in ay la socdaan xabsiyada kormeerayaal madaxbanaan oo aan dowli aheyn intii lagu jiray sanadka. Wakiilo ka socda Xafiiska Qaramada Midoobay ee Maandooriyaha iyo Dambiyada ayaa booqday xabsiyada Garowe, Boosaaso iyo Hargeysa dhowr mar. Wakiilo ka socda UNSOM, hayado kale ee QM iyo hey'ado samafal ayaa booqday dhowr xabsi oo ku baahsan dalka. Joqoraafi ahaan meelaha aan la gali karin iyo amaanka ayaa xanibay in kormeer nuucaas ah lagu sameeyo degaanada ay gacanta ku hayaan al-Shabaab ama goobaha lama galaanka ah ee masuuliyiinta dhaqanku ay gacanta ku hayaan.

Hagaajin : Dhismaha dib u hagaajinta ee Xabsiga Dhexe ee Muqdisho kaas oo la bilaawday magacaabista xilka cusub ee madaxa ilaalinta xabsiyada ee heer federaal sanadkii 2015tii, masuuliyiintu waxa ay dib u dejiyeen da'yarta, kuwa aan rabshadaha isticmaalin iyo maxaabiista haweenka ah, dhinac dib loo dayac tiray ee xabsiga kaas oo cariirigiisu yaraa, waxaa ayna heleen biyo socda, musqulo, waxbarasho dhexdhexaad ah iyo barnaamijo xirfadeed. Kormeerayaal madax banaan ayaa booqday Xabsiyada Dhexe ee Muqdishu, Garoowe iyo Hargeysa waxa ayna xaqiijiyeen in ay soo hagaagtay booqashadooda iyo xaaladoodu.

d. Xarig iyo Xabsi Ku Heyn Aan loo meel dayin

Inkasta oo Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah uu mamnuucayo in dadka sharci daro lagu xiro, ciidamada dawladda iyo maleeshiyaadka raacsan, maamul goboleedyada, maleeshiyaadka qabiilada iyo Al Shabab waxay u xireen una hayeen dadka si aan loo meel dayin (fiiri qeybta 1.g.).

Kaalinta Doorka Boliiska iyo Habka Nabadgelyada

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in ciidamada gaashaandhigu ay mas'uul ka yihiin sugida madaxbanaanidda dalka, xoriyadda, iyo midnimada dhulkeed iyada oo ciidamada boliiska ee qaranka iyo gobaladu ay mas'uul ka yihiin ilaalinta nabadgelyada, nolosha, hantida iyo, nabadgalyada iyo amaanka. Guud ahaan, booliisku waxa u ahaa mid aan taabogal aheyn oo aan heysan qalab iyo tabar ku filan. Tusaale ahaan gudaha Muqdishu booliisku ma aanay heysan gaadiid ku filan oo ay uga qaadaan maxaabiista saldhiga kuna geeyaan xabsiga ama xarumaha caafimaadka. Waxaa jira warbixino sheegayay in

boliiska uu ku lug yeeshay laaluush.

AMISOM iyo SNA ayaa ka shaqeyay in ay sugaan kala dambeeynta meelo ku yaalau gobolada koofurta iyo kuwa bartamaha. DFS waxa ay si joogto ah ugu tiirsantahay ciidama NISA in ay qabato hawshii boliiska, iyadoo inta badan, ugu yeeray in ay xiraan oo ay hayaan dadka rayidka ah iyaga oo aan u heysan ruqsad ay ku soo xiraan. Magaalooyinka qaar iyo dhulka baadiyaha ee ka tirsan koonfurta iyo gobolada dhexe ayaa wali ku sii jiray gacanta Al Shabaab iyo maleeshiyooyinka la ologga ah. Wasaaradda Gaashaandhigga ayaa mas'uul ka ah xakameynta ciidamada qalabka sida. Ciidamad boliisku waxa ay hoos yimaadaan isku dhafka maamulada maxaliga ah, maamul goboleedyada iyo dowlada. Ciidamada boliiska qaranku waxaa uu hoos imaanayay Wasaaradda Amniga Gudaha, halka masuuliyiinta maamul goboleedyadu ay gacanta ku hayaan ciidamada boliiska ee degaankooda oo hoos imaanayay Wasaaradda Arrimaha Gudaha ama Amniga ee degaanadooda.

Maamulada rayidka ah ma ayasan laheyn hab wax ku ool ah oo ay ku kantaroolaan ciidamada amaanka. Ciidamada nabadgelyadu way ku xadgudbeen dadka rayidka ah, sida badan waxa ay ku guul dareysteen in ay ka hor tagaan ama jawaab ka bixiyaan rabshadaha bulsho. Inkasta oo Masuuliyiintu ay mararka qaar isticmaalaan maxkamadaha ciidamada qalabka sida in ay maxkamad saaraan shaqsiyaadka la aaminsanyahay in ay masuul ka yihiin xadgudubyada, guud ahaan ma aanay baarin xadgudubyada boliiska, ciidamada iyo xubnaha maleeshiyaadku, dhaqanka ka sareeynta sharcigu waxa uu ahaa mid baahsan. Tusaale ahaan, waxaa la soo wariyay in 1dii Agoosto gudaha Muqdishu uu askari katirsan NSA uu ku dilay wade bas intii uu isku dayay in uu baad ka qaado. Askariga lama xirin.

Gacan ku heynta ciidamada ee Wasaaradda Gaashaandhiggu waxa ay aheyd mid aad u liidata laakiin ka soo raynayay ilaa xad iyaga oo gacan ka helay deeq bixiyayaasha caalamiga. Dhamaadkii sanadka ciidamadu waxa ay ka koobnaayeen inta u dhaxeysa 11,000 iyo 14,000 oo askari, sida ku saleysay qiyaas ay bixiyeen ururo caalami ah. Badi ciidamadu waxa ay fadhiyeen gobolada Shabeelada Dhexe iyo Shabeelada hoose, sidoo kale gudaha MKKG iyo MKJ. Wasaarada Gaashaandhigu waxa ay xoogaa saameyn ah ku lahayd gacan ku heynta ciidamada guud ahaan nawaaxiga Muqdisho oo gaarsiisnaa koofuurta ilaa Gobolka Shabeelada Hoose, Galbeed ilaa Baydhabo, Gobolka Baay, waqooyiga ilaa Jowhar, Gobolka Shabeelada Dhexe. Ciidanka Xoogga iyo maleeshiyaadka raacsan dowlada ayaa marka qaar la howlgalyay AMISOM meelaha AMISOM la geeyay.

Ciidamada boliiska ee dowlada dhexe waxa ay sii wadeen sii joogitaankooda 17ka degmo ee caasimada. AMISOM waxa ay qaabeysay cutubyo buuxiyay dadaalada maxaliga iyo DFS ee ku aadan in Muqdisho loo sameeyo boliis. Saraakiishaas boliisku waxa ay siiyeen taakuleyn xagga la talinta iyo tusaaleeyn ee ku saabsan waajibaadka asaasiga ah ee boliiska, ixtiraamka xaquuqul insaanka, istiraatiijiyada ka hortaga dambiyada, ka qabashada howlaha boliiska bulshada dhexdeeda iyo habraaca baaritaanka. In ka badan 300 oo saraakiisha boliiska AMISOM ah ayaa ka dhinac shaqeyay cutubyada la abuuray si ay tababar u siiyaan boliiska qaranka.

Habka Xiritaanka Iyo Sida Loola Dhaqmo Maxaabiista

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in dadka la xiro la horgeeyo masuuliyiinta garsoorka 48 saacadood gudohood. Sharcigu waxa uu waajib ka dhigayaa in la hayo ruqsad soo xiritaan oo leh cadeyn ku filan oo ay soo saaraan saraakiisha awooda u leh marka la soo xirayo qof la tuhunsanyahay. Sharcigu waxa kale oo dhigayaa in dadka la xiro markiiba lagu wargeliyo dacwadda loo heysto iyo go'aanka garsoorka, si dhaqso ahna loogu ogolaado qareen iyo qoyskiisa iyo daryeelada sharci ee kale. Waxa ay aheyd dhif in loo hogaansamo ilaalintaas sharci. DFS waxa ay geeysatay xiritaano aan loo heysan amar maxkamadeed dadkana waa la iska hayaa iyada oo aan loo meel dayin. Mararka qaarkood dawladdu dadka caanka ah ee maxabiista ah ee xiriirka la leh Alshabaab waxay ay ku haayeen guri amaan ah inta aan si rasmi ah dacwad loogu soo oogin. Sharcigu waxa uu ogol yahay in damaanad qofka lagu sii daayo in kastoo aanay masuuliyiintu marwalba ixtiraamin qodobkaas. Dawladdu marmar dhif ah ayey dadka saboolka ah u qabataa qareen. Dawladdu dadka la tuhunsan yahay waxa ay ku haysay xabsi guri, gaar ahaansi dadka caanka ah ee ka soo goosta Al-Shabaab oo xiriir adag la leh qabiilada xoogga badan. Xubno ka tirsan ciidamada nabadgelyada iyo saraakiisha garsoorka ee wax musuqmaasuqa, siyaasiyiinta iyo hogaamiyayaasha qabiilada ayaa isticmaalay saameyntooda si loo sii daayo maxaabiis.

Xarig Aan loo Meel Dayin : Dowladda iyo maamul goboleedyadu waxa ay si aan loo meel dayin u xirxireen una hayeen tiro dad ah, oo ay ka mid yihiin dadka lagu soo eedeeyay argagixisanimo iyo taagerada Al-Shabaab. Masuuliyiintu waxa ay si soo noq noqosha ah u isticmaalaan eedeemaha la shaqeynta al-Shabaab si ay qiil sameeyaan xiritaanada aan loo meeldayin (fiiri qeybta 1.a.).

Dawladda, masuuliyiinta gobolada, iyo maleeshiyada qabiiladu waxa ay si aan loo meel dayin u xireen wariyayaasha.

Ciidamada dawladdu waxa ay fuliyeen hawlgalo ay ku xirxirayeen dhalinayro lagu qabay tuhmad iyaga oo aan heysan ruqsad lagu soo xiro.

Maxakamad Sugayaasha: Maxkamad sugayaasha oo muddo dheer xabsiga lagu hayo waxa ay iska ahayd wax mar walba dhaca, inkasta oo aan la heyn celceliska qiyaasta mudada lahayo ka hor inta aan dacwadooda la qaadin ama boqolkiiba inta dadka sugaya in dacwadooda la qaado ay kka yihiin tirada dadka ku jira xabsiyada. Dadka xiran oo fara badan, maamulka maxkamadaha iyo garsoorayaasha oo yar, iyo nidaamka maxkamadaha oo ah mid fadhiid ah ayaa keenay in ay daahaan qaadista dacwooyinku.

Awooda Maxaabiisu in ay ka doodaan sharicinamda xarigooda ka hor inta aan la maxkamadeyn : Sharcigu waxa uu siinayaa dadka la soo xiro xaqa ay u leeyihiin in ay uga doodaan maxkamadda dhexdeeda sharcinimada uu ku saleeysanyahay xarigooda, laakiin kaliya siyaasiyiinta iyo ganacsatada ayaa si buuxda u isticmaali karay xaqaan si wax ku ool ah.

e.U Diiditaanka Maxkamadaha Cadaalad ah oo Dadweynaha U Furan

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa, "Garsoorku waa mid ka madax banaan laamaha fulinta iyo sharci dejinta ee dawladda." Si kastaba ha ahaatee, Garsoorka madaniga ah waxa uu ahaa inta badan mid aan ka shaqeyneyn waddanka oo dhan. Gobolada qaarkood waxa ay sameysteen maxkamadaha degaanka oo ku tiirsan qabiilka ugu badan ee degaanka iyo garabyada xiriirka la leh si ay u shaqeeyaan. Badi degaanada garsoorku waxa uu ku tiirsanaa isu geynta sharciyada dhaqanka iyo caadada, shareecada iyo sharciga rasmiga ah. Garsoorka waxaa lagu lahaa saameeyay iyo musuqmaasuq. Waxaana si weyn u saameeyay siyaaddo ku saleeysan qabiil. Masuuliyiintu ma ixtiraamin amarada maxkamadda. Garsoorayaasha madaniga ah sida badan way ka cabsadaan dhageysiga dacwadaha, iyaga oo u dhaafay maxkamadaha ciidamadu in ay dhageystaan dacwadaha madaniga ah intooda badan.

Somaliland waxaa ka jiray maxkamado shaqeynayey, in kastoo ay aad ugu yaraayeen garsoorayaal tababaran iyo dokumeentiyo sharci oo laga saleeyo sareynta mudnaanta garsoorka, iyo eedeeymaha musuqmaasuqa oo soo kordhayay. Habka garsoorka isku dhafan ee Somaliland waxa ka koobnaa shareecada (sharciga islaamka), caado dhaqameed, iyo sharci rasmi ah, laakiin si

fiican isuma ay dhax galin. Waxaa jiray fara gelin baahsan oo lagu sameeyo habka garsoorka, iyada oo saraakiisha dawladdu si joogta ah u farageliyeen si ay u saameeyaan kiisaska, si gaar ah kuwa ku lugta leh wariyayaasha. NGOyada caalamiga ah waxa ay soo wariyeen in saraakiishu guduhu fara gelin ku sameeyeen arimo sharci ayna ka boodeen sharciga nadaamka daweynaha si ay u hayaan una xabisaan dadka maxkamad la'aan.

Maxkamadaha Puntland, inkastoo ay shaqeynayaan, waxa ka maqnaa awooda in ay bixiyaan daryeel siman sharciga hortiisa, waxaana heystay caqabado iyo nusqaan la mid ah kuwa maxkamadaha Somaliland.

Odayaasha dhaqanka ee qabiilada ayaa dhexdhexaadiyay khilaafaadka dalka oo dhan. Qaabiiladu waxa ay si soo noq noqota u isticmaaleen una dabakheen habka cadaalada ee dhaqanka si degdeg ah. Xukunada dhaqanka waxay mararka qaarkood dusha ka saareen qabiilka oo dhan ama jifada hoose masuuliyadda xadgudubyada lagu soo eedeeyay shaqsiyaadka.

Habka Dhageysiga Dacwadaha

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu leeyahay "Qof kasta waxa uu xaq u leeyahay dhageysi cadaalad ah oo dadweynaha u furan oo ay dhageysato maxkamad madaxbanaan oo dhexdhexaad ah ama gudi, laguna qaado waqti munaasib ah." Sida uu qabo dastuurka federalka ku meel gaarka ah, shaqsiyaadku waxa ay xaq u leeyihiin in loo aqoonsado in aanay dambiile aheyn, waxaa kale oo ay xaq u leeyihiin in markiiba lagu wargeliyo eedeemaha loo heeysto oo faahfaahsan, inkasta oo dastuurku uusan cadeyn xaq in loo macneeyo uu khuseeyo inta ay socdaan dhamaan rafcaanadu. Dadka la hayo waxa ay xaq u leeyihiin in la hor keeno maxkaamad karti leh 48 saac gudahood marka la soo xiro, in ay la hadlaan qareen (ama la siiyo mid ay kharajkiisa bixineyso dowladu hadii uu sabool yahay) aanan lagu qasbin in ay dambi ku cadeeyaan naftooda. Sharcigu waxa uu xuquuqdaas siinayaa dhamaan muwaadiniinta oo dhan, laakiin masuuliyiintu ma aysan ixtiraamin xuquuqda la xiriirta habka dhageysiga dacwadaha. Dastuurka ku meel gaarka kama uu hadlo helitaanka cadeemaha ay dowladu heyso, markhaatiyaasha oo su'aalo la weydiin karo, xaq racfaan ka qaadashada go'aanka maxkamadda iyo in la siiyo waqti ku filan iyo agab ay ku diyaasadaan difaac ama xaq in uu la yimaado cadeyn iyo markhaatiyaal.

Maxkamadaha ciidamada ayaa la saaraa dadka rayidka ah. Eedeysanayaasha la

horkeeno maxkamadaha ciidamada mar mar dhif ah ayeey heleen matalaad shacri ama xaqa in ay rafcaan qaataan. Masuuliyiintu waxa ay maraka qaar xukunka dilka fuliyaan maalmo gudahood marka xukunku dhaco (arag qeybta 1.a). Saraakiisha dawladda qaarkood ayaa sii waday in ay ku andacoodaan in xaaladdii degdegga aheyd ee dalka lagu soo rogay 2011 in ay awood u siinayso maxkamadaha ciidamadu in ay dhageystaan dacwadaha falka dambiyeedka oo ay ka mid tahay kuwa ay geystaan rayidku, qeybo ka mid ah Muqdisho oo ay Al-Shabaab ka baxday. Ma jirin siyaasad cad oo dawladdu ku cadeysay in wareegtadaas ay weli dhaqangal yahay iyo in kale.

Gudaha Somaliland, guud ahaan waxaa eedeysanayaasha loo aqoonsan yahay in aanay dambiile aheyn ilaa dacwad looga helayo iyo in dacwadooda lagu qaado maxkamad dadweyne, in ay goobjoog ka ahaadaan marka dacwadooda la qaadayo iyo in ay qareen la tashtaan dhamaan marxaladaha kala duwan ee dhageysiga dacwad dambiyeedka. Dowladdu marwalba uma aanay wargelin eedeysanayaasha si dhaqso ah iyo iyada oo faahfaahsan dacwadda loo heysto, loomana ogolaan in ay arkaan cadeynta dawladdu heyso. Dowladdu ma siinin eedeysanayaasha goob loogu tala galay oo ay ku diyaarsadaan difaacooda laakiin guud ahaan waxaa la siiyaa waqti ku filan oo ay ku diyaar garoobaan. Dowladdu waxa ay eedeysanayaasha siisay fasiraad lacag la'aan ah ama waxa ay lacag siiyeen kuwo gaar ah hadii ay rabeen in ay diidaan fasiraadda xakuumadu siisay laga billabo marka la soo eedeeyo ilaa iyo inta rafcaanku uu socdo oo dhan. Eedeysanayaashu su'aalo wey weydiin kareen markaantiyaasha, keeni kareen markhaatiyaal iyo cadeeymo ay isku difaacaan, iyo iyaga oo racfaan ka qaadan karay go'aanka maxkamadda.

Somaliland waxa ay eedeysanayaasha lagu soo oogay dambiyada culus siisay qareeno lacag la'aan ah haddii aanay awoodi karin in ay qareeno gaar ah qabsadaan. Eedeysanayaashu waxa ay xaq u lahaayeen in aan lagu qasbin in ay markhaati furaan ama ay qirtaan dambiga. Waxaa jiray xafiisyo xaga sharciga oo dadka la taliya oo shaqeynayay.

Gudaha Puntland hogaamiyaasha qabiilada ayaa xaliyay kiisaska intooda badan iyaga oo isticmaalay sharci dhaqameed. Garsoorka habeysan ee maamulku waxa ay xaliyeen kiisaska kuwa aan la heyn matalaad qabiil. Guud ahaan waxaa eedeysanayaasha loo aqoonsan yahay in aanay dambiile aheyn ilaa lagu cadeeyo, xaqa maxkamad dadweynaha u furan, xaqa in uu difaaco qareen oo ay la tashadaan dhamaan heerarka kala duwan ee dhageysiga dacwad dambiyeedka, iyo in ay qaataan rafcaan. Masuuliyiintu inta badan kuma aysan wargelin eedeysanayaasha si dhaqso ah oo faahfaahsan dacwadda lidiga ku ah inta badana looma ogolaan in

ay helaan cadeynta dowladda heyso. Eedeysanayaashu waxa ay xaq u heleen in ay keenaan markhaatiyaashooda iyo cadeymahooda. Masuuliyiintu ma aysan siin eedeysanayaasha meel loogu talo galay oo ay ku diyaarsadaan difaacooda laakiin guud ahaan waxa la siiyay waqti ku filan oo uu ku diyaargaroobaan. Masuuliyiinta Puntland waxay eedeysanayaasha siiyeen adeeg fasiraad oo lacag la'aan ah marka loo baahdo. Dowladdu waxa ay inta badan dib u dhigtay dhageysiga dacwadaha muddo aan macquul aheyn.

Nidaam garsoor oo rasmi ah oo shaqeynaya kama jirin dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso. Guud ahaan maxmadaha Shareecada eedeysanayaashu inta badan naftooda ma difaacin, ma keensan markhaatiyaal, mana laheyn qareen matala.

Maxaabiista siyaasadeed iyo kuwa la hayo

Intii sanadka lagu jiray Lama oga tirada dadka loo xiray sababo ay ka dambeyso siyaasadu. Dowladda iyo maamul goboleedyadu waxa ay xireen suxufiyiin iyo dad kale oo wax ka sheegay masuuliyiinta.

Masuuliyiinta Somaliland waxa ay sii wadeen in ay xiraan dadka degan Somaliland ee ay shaqaaleeyso dowlada federaalka ee Muqdishu, mararka qaar muddo dheer. Masuuliyiinta Somaliland uma ay fasaxin saraakiisha joogta Muqdisho in ay ku matalaan gudaha ama u matalaan dowlada federaalka ah ee Soomaaliya, waxa ayna u arkayeen falalka noocaas ah sida khiyaamo qaran, taasoo lagu ciqaabi karo sida uu qabo dastuurka Somaliland.

Intii lagu jiray sanadka Ahmed Hussein Sitin, oo xubin ka ah baarlamaanka defederaalka ayaa loo xiray lana hayay intii lagu jiray Julaay 2015 ku soo noqoshada Somaliland isaga oo aan fasax ka heeysan dowladda, waa la sii daayay.

Nidaamka Maxkamadaha Madaniga ah iyo Xalintooda

Ma jiro dacwad sharciyeed la ogyahay oo raadinaya magdhaw dhib loo geystay, ama hoos u dhac ku yimid xadgudbyada ee gobol kasta intii lagu jiray sanadka, inkastoo dastuurka ku meel gaarka ah ee federaalku uu siinayo "nidaam haboon oo lagu xaliyo xadgudubka xuquuqda aadanaha."

Magdhaw Hantiyeed

Gudaha Muqdisho dowladda iyo kuwo kale ayaa dadka ka saaray guryahooda, gaar ahaan barakacayaasha gudaha ee soo laabtay iyada oo aan la marsiin habka cadaalada (fiiri qeybta 2.d.).

f. Iyada oo Aan loo meel dayin iyo faragalin Sharci daro ah ee Arimaha Gaarka U Ah Qofka, Qoysaska, Guriga Ama Fariimaha La Isu Diro.

Sida uu qabo Dastuurka Federalka ku meel gaarka ah "qof kasta waxa uu xaq u leeyahay in uu yeesho, isticmaalo, ku raaxeysto, iibiyo, ama uu wareejiyo hanti" guryaha gaarka ahna aan lagu xadgudbi karin. Hase yeeshee, masuulyiintuu waxa ay baareen guryo iyaga oo aan heysan ruqsad baaritaan.

Intii lagu jiray sanadka AMISOM iyo ciidamada Soomaalidu waxa ay gacanta ku sii hayeen meelo dhowr ah oo laga xoreeyay al-Shabaab intii lagu jiray 2015. Dib u soo noqoshada dadkii horay uga barakacay degaanada dhawaanta la xoreeyay waxa ay sii waday in ay keento muran xaga lahaanshaha dhulka ah. Ma jiraan nidaam degsan oo wax looga qabto muranada noocaas ah.

Dawladda iyo maamul goboleedyadu waxa ay qashqashaad u geystaan dadka qaraabada la ah xubnaha Al-Shabaab.

g. Xadgudubka Khilaafaadka Gudaha

Dilalka: Intii lgu jiray sanadka iska horimaadyada Dagaal ee dhex marayay dawladda, maleeshiyaadkaa , AMISOM iyo Al-Shabaab waxa ay keeneen dhimashada iyo dhaawaca dad rayid ah iyo kuwa kalé oo badan oo barakacay. Rabshadaha siyaasadeed ee ku saleysan qabiilka ayaa lug ku yeeshay dilal aargoosad ah iyo weeraro lagu qaaday goobaha ay deganyihiin dadka rayidka ah. Isku dhacyo u dhexeeyay ciidamo ku saleysan beelo iyo al-Shabaab oo ku dhax maray gudaha Galmuudug, Shabeelada Hoose iyo Hiiraan ayaa sidoo kale keenay dimasho.

Somaliland waxa ay isticmaashay awood ciidan si ay u caburiso kuwa ka soo horjeeda is diiwaangalinta cod bixiyayaasha doorashooyinka ee gobolada lagu muransanyahay (fiiri qeybta 1.a.).

Sida ku xusan warbixinada UNISOM, weerarada ciidamada amaanka ee ka dhanka ah al-Shabaab, kooxaha kale ee hubeysan, ama shaqsiyaadka iyo rayidka intii

udhexeysay Janaayo iyo Agoosto ayaa keenay dhimashada 492 qof oo rayid ah, iyo dhimashada ay geeysteen NSA (44 dhimasho, 76 dhaawac ah), AMISOM (sideed dhimasha, sagaal dhaawac), Ciidamada Difaaca Keenya ee iskood u howlgala (38 dhimasho oo ay ku jiraan afar caruur ah iyo 11 dhaawac ah). Alshabaab waxa ay u geeysteen dilal badan dadka rayid ah, oo ay ku jiraan 214 dhimsho ah iyo 346 dhaawac ah intii lagu jiray mudadaas.

Al-Shabaab waxa ay geeysteen dilal siyaasadeeysan oo lala eegtay dadka rayidka ee lala xiriiriyay dowlada iyo weeraro loo geeystay shaqaalaha hay'adaha samafalka ee NGOyada, Shaqaalaha QM iyo howlwadeenada diblomaasiyiinta. Al-Shabaab waxa ay inta badan adeegsatay weerarada is miidaamin ah, hoobiyayaal iyo waxyaabaha qarxa ee meesha fog laga hago. Waxaa kale oo ay dileen dadka caanka ee nabad u ololeeya, hogaamiyayaasha bulshada, hogaamiyayaasha qabiilada iyo qoysaskooda doorka ay ka qaataan dhismaha nabagelyada darteed, iyo iyagoo madaxa ka jara dadka lagu eedeeyo in ay basaasiin u yihiin, lana shaqeeyaan ciidamada dowladda iyo maleeshiyaadka raacsan.

21kii Agoosto, al-Shabaab waxa ay gaari laga soo buuxiyay walxaha qarxa in ay weeraraan xafiisyada dowlada oo ku yaalay meel ku xigta suuq ku yaalay gudaha Gaalkacyo, 23 qof ayaa lagu dilay, oo ay ku jiraan saraakiil dowlada, howlwadeenada amaanka iyo ganacsato.

Qafaalashada : Laga soo bilaabo Janaayo ilaa Sebteember, al-Shabaab waxa ay qafaalatay 152 qof, 80 ka mid ah waxaa la sii daayay mar dambe.

Ka dib weerarkii 22ka Sebtembar lagu qaaday saldhiga boliiska ee magaalada xadka ku taal ee Libooya, Al-shabaab waxa ay fagaare ka sheegeen in ay qabsadeen laba sarkaal oo ka tirsan boliiska Keenya. Sida laga soo xigtay saraakiil Keenyaan ah, labada sarkaal ee boliiska ah waa la la'aa dhamaadkii sanadka.

Tacadiyada Jireed, Ciqaab Iyo Jir Dilka: Ciidamada dawladda, maleeshiyada raacsan, rag xiran dharka ciidamada, iyo ciidamada AMISOM waxa ay isticmaaleen awoodo xad-dhaaf ah oo ay ku jiraan jir dil, kufsi haween iyo gabdho, oo ay ku jireen barakacayaasha guduhu, inkasta oo ay ciidamadu xireen qaar ka mid ah ciidamada amaanka ee lagu soo eedeeyay tacadiyo noocaas ah, hadana ka sareeynta sharcigu waxa ay aheyd wax iska caadi ah.

Alshabaab waxa ay geeystay rabshado xagga galmada ah, oo ay ku jirtay iyada oo loo maray guur khasab ah.

7dii Maajo, 2014 askarta UMISOM oo ka socday Itobiya ayaa lagu eedeeyay kufsashada laba gabdhood oo da'doodu aheyn da'da 15 iyo 17 jirka, gudaha Gobolka Galgaduud. AMISOM ayaa baartay laakiin waxa ay sheegeen in aysan helin cadeeymo ku filan si ay u sii wadaan baaritaan balaaran.

Sida laga soo xigtay Hay'adda Adeegyada Wax ka qabashada Miinooyinka ee QM, waxa Waxyaalaha Qarxa ay dileen 276 qof ayna dhaawaceen 727; miinooyinka dhulka ayaa dilay hal qof dhaawacayna hal kale, waxyaalaha qarxa ee ka hara dagaalada ayaa dilay hal qof dhaawacayna 13.

Caruurta Loo Qorto Askarta: Intii lagu jiray sanadka waxaa jiray warbixino iska daba imaanyay oo ah in SNA iyo maleeshiyada raacsan, ASWJ iyo Al-Shabaab ay u isticmaalayeen caruur askar ah.

Saraakiisha QM waxa ay diiwaan galiyeen intii lagu jiray sanadka qorashada iyo isticmaalka askar ahaan 1744 caruur ah (1679 wiilal, 65 gabdhood) oo ay ku jiraan al-Shabaab (1,091), SNA(169) maleeshiyaadka qabaa'ilada (415),ASWJ (67) iyo kooxaha kale ee hubeysan (laba). Waxaa jiray 1,381 caruur ah (1,306 wiil, 75 gabdhood) oo la qafaashay, 875 waxaa qafaashay al-Shabaab, 373 NSA, 125 maleeshiyaadka qabaa'ilada iyo 12 ASWJ, AMISOM iyo kooxo aan la aqoon oo hubeysan ayaa mid walba masuul ka ahaa qafaalashada todoba. In ka badan kala bar caruurta ay qafaasheen al-Shabaabwaxaa loo isticmaalay in lagu kordhiyo xubnahooda ka hor howlgalada XDS/AMISOM, oo uu ku jiro weerarkii Maarso ee Puntland. Tirada la qortay intii lagu jiray nuska hore ee sanadka waxa uu la ekaa intii la qortay 2015ka oo dhan, taas oo tuseysa kororka qorashada al-Shabaab. Caruurta ay qafaasheen AMISOM caadiyan waxaa lagu siidaayay laba maalin gudahood iyaga oo aan la dhibaateeyn. Sababta loo qafaashay waxa ay aheyd mid aan cadeyn.

Hirgalinta qorshihii wax qabadka dowlada ee 2012 ee ay kula jirtay Qaramada Midoobay si loo dhameeyo qorashada iyo u isticmaalka caruurta ee ciidamada qaranka waxa uu ahaa mid qabyo ah.

Horinta Dhowritaanka Caruurta(HDC) ee XDS waxa ay soo wariyeen in ay ku sameeyeen tababaro olole wacyi galin ah gudaha Muqdishu, Guul Wadayaasha, Xerada Ciidamada ee Siyaad iyaga oo ka tababaray muhiimada ay leedahay ka hortagida qorashada caruurta ee ciidamada amaanka. HDC iyo kuwa xudunta u ee heer gobol waxa ay sii wadeen in ay la socdaan XDS, oo ay ku jirto in ay

kormeeraan xarumaha waaweyn ee tababarka XDS ee gudaha Muqdisho iyo dhowr meelaha laga qorto oo ka hooseeya heer qaran iyo meelaha gunada lagu qaato ee Muqdisho. Guul Wadayaasha iyo Saldhiga Ciidamada ee Siyaad. HDC ma aanay soo saarin wax caruur ah oo askar ah intii lagu jiray sanadka.

Intii lagu jiray sanadka Qaramada Midoobay waxa ay gacan ka geysatay dib u midoobida 854 caruur ah oo la ka tirsanaa ciidamo hubeysan (722 wiil, 123 gabdhood) ay dib ula midoobaan qoysaskooda iyo bulshadooda. Howlaha dib ula madoobida waxaa ku jiray siinta kaalmo nafsdeed, barnaamijyada kaalmada “ ku noqoshada iskuulada” iyo tababaro xirfadeed.

Maqnaashada qaab lagu diiwaan galiyo dhalashad darteed, sida badan way adkeed in la ogaado da'da dadka loo qorto ciidamada amaanka qaranka.

Al Shabaab waxa ay sii waday qorashada iyo in ay caruurta ku qasbaan ka qeybqaadashada colaadaha tooska ah, oo ay ku jiraan weerarada ismiidaaminta ah. Al-Shabaab waxa u dhaceen iskuulada, dugsiyada quraanka, iyo masaajidada s ay uga qortaan caruur. Caruurta ku jirtay xarumaha tababarka ee al-Shabaab waxaa la marsiiyay tababaro jireed oo adag, raashin aan habooneyn, tababar xagga hubka ah, ciqaab jireed, iyo tababro diineed. Tababarka waxaa kale oo ka mid ahaa caruurta oo lagu qasbay in ay ciqaabaan oo toogtaan caruurta kale. Al-Shabaab waxa ay caruurta u isticmaaleen dagaalada, oo ay ka mid yihiin in ay safka hore ka geliyaan dagaalada kana dhigtaan gaashaan iyo in ay is miidaamiyaan. Waxaa intaas dheer in Al-Shabaab ay caruur u isticmaaleen kaalin taageero sida in ay u qaadaan, rasaasta, biyaha iyo cuntada, in ay qaadaan dhaawacyada iyo meydka maleeshiyada , sirdoon iyo ilaalo ahaan. Ururku waxa ay mararka qaar caruurta u isticmaaleen in ay aasaan bambooyinka la dhigo wadooyinka dhinacooda iyo waxyaabaha qarxa. Warbaahinta Soomaalida ayaa si joogta ah uga hadashaa Alshabaab oo caruur ku (tashkiilinaya) dhalaan rogaya dugsiyada iyo iyaga oo si xoog ah ugu qorta darajooyinka ciidamadooda.

Masuuliyiintu waxa ay ku wareejiyeen caruurta laga soo saaray kooxaha hubeysan Sanduuqa Qaramada Midoobay ee Caruurta (UNICEF).

Gudaha Maarso ciidamada dowlada ee gudaha Puntland iyo Gaalkacyo waxa ay qabteen 108 oo ka garab dagaalamayay al-Shabaab gudaha Puntland iyo Gaalkacyo, 108da caruurta ah ee gudaha Puntland, 70 ka mid ah ciidamadu waxa ay u gudiyeen Muqdishu si ay uga helaan taageero dib ugu midoobid NGO ay taageerto UNICEF. Inkasta oo madaxweynaha Puntland uu sheegay sida ay uga

go'antahay in uu san dil ku fulin cid ka mid ah 108 caruurta ah, 10 ayaa lagu xukumay xukun dil ah, 28 kale waxaa lagu xukumay xabsi u dhaxeeya 10 ilaa 20 sano, iyada oo lagu saleeyay da'dooda. UNICEF waxa ay sii waday in ay u ololeeyso in la yareeyo xukunadooda iyo in loo wareejiyo 38da caruurta ah ee haray si loo siiyo kaalmo dib ula midoobid.

Xadgudubyada Kale ee la xiriira iska hor imaadyada : Kooxaha hubeysan, gaar ahaan Al- Shabaab, laakiin sidoo kale ciidamada dawladda iyo maleeshiyaad, ayaa si bareer ah u xadiday isu gudubka garagaarka bini'aadnimada iyo waxyaabaha kale ee lagama maarmaanka u ah nolosha dadka madaniga ah iyo sidoo kale in ay tagaan heyadaha gargaarku goobahaas, gaar ahaan gobolada koonfurta iyo gobolada dhexe.

Shaqaalaha samafalku waxa ay si joogta ah ula kulmeen baro kantarool, jid gooyo, baad, afduubka gawaarida, iyo caqabado dhinaca maamulka ah. Ururada samafalka waxaa sida badan loola dhaqmay si tuhun ku jiro, waxaana laga qaaday baad. Intii lagu jiray lixdii bilood ee ugu horeeysay sanadka, sida laga soo xigtay Qaramada Midoobay, in ka badan 80 dhacdo oo la xiriiray amaanka oo si toos ah saamaeyn ugu yeeshay heyadaha samafalka ayaa dhacay, oo ay ku jirtay dhimashada shan shaqaalaga gargaarka ah, dhaawaca sideed, iyo xiritaanka 10, qafaalashada sadex, iyo weeraro jireed oo loogeystay shan.

Ciidamada dowladu waxa ay la wareegeen kaalmada gargaarka. Tusaale, ahaan 31kii Maarso, ciidamada XDS ayaa la soo sheegay in ay leexsadeen gaari xamuul oo ay laheyd Barnaamijka Cuntada Aduunka (WFP) oo ka soo safray Mombasa, Kenya una socday Ceel Waaq, Soomaaliya. Waxa ay xadeen raashunkii. Maamulka maxaliga ah ee Ceel Waaq ayaa did u helay shixnada. Intii lagu jiray Maajo iyo Juun masuuliyiinta dowlada ayaa kula wareegay garoonka diyaaradaha ee Muqdisho raashin ay laheyd Barnaamijka Cuntada Aduunka (WFP), iyagoo raacaya warbixin qarsoon oo khalad ah oo sheegaysay in uu dhacay. Intii uu ku jiray gacanta dowlada, xaalada raashinka lala wareegay waa ay sii xumaatay, waxa ayna gaartay heer aan dadku quudan karin.

Al-Shabaab waxa ay la wareegtay deeqada gargaarka. Tusaale ahaan 13kii Abriil waxa ay kula wareegtay gaari xamuul ah oo oo siday xamuull raashin ah oo ay laheyd Barnaamijka Cuntada Aduunka ee WFP meel u dhaw Ceel Waaq. Barnaamijka Cuntada Aduunku waxa ay waxa uu hakiyay howlihii muhiimka ahaa ee banaanka Ceel Waaq, oo ay ku jirtay daaweeynta dadka aad u macluulay, ilaa

darawalka, gaariga, iyo xamuulka saaran laga soo daayo.

Iska horimaadyada ka jiray dhulalka lagu muransanyahay ee Sool iyo Sanaag ee u dhaxeeyay Somaliland iyo Puntland, ayaa xayiray helitaanka samafalka. NGOyadu waxa ku warbixiyeen dhacdooyin qashqashaad ah oo ay geeysteen maamulada maxaliga ah ee Somaliland iyo Puntland.

Al-Shabaab waxa ay xayireen helitaanka gargaarka ee 28 degmo oo kuyaala koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, oo ay ku jireen shixnado aad loogu baahnaa oo u socday dhulalka ay xoreeyeen AMISOM. Human Rights Watch waxa ay sheegtay in al-Shabaab ay ku soo rogeen go'doomin nawaaxiga Xudur, Buul-Burte, Ceelbuur, Qoryooleey iyo tuulooyin kale oo ay xoreeyeen AMISOM iyo ciidamada dowlada Soomaaliya, iyadoo aad u xayiray dhaq-dhaqaaqa badeecadaha, kaalmada iyo dadka.

Al-Shabaab waxa ay xayirtay daryeelka caafimaad, oo ay ku jirto iyaga oo u diiday rayidka in ay u safraan meelo kale si ay u helaan daryeel, iyaga oo burburiyay daawooyinka ay bixiyeen hay'adaha gargaarku, iyo iyaga oo xiray bukaan socod eegtooyinka caafimaad.

Hay'adaha gargaarka ee caalamiga ah waxa ay ka daad gureyteen shaqaalahooda iyaga oo joojiyey qeybinta cuntada iyo adeegyada kale ee la xiriiray gargaarka dhulalka ay Al-Shabab gacanta ku heyso taasoo ay ugu wacan tahay dilalka, baadda, hanjabaad qashqashaad, ceyrinta iyo mamnuucidda Al-Shabaab. Bishii Maarso 15keedii, tusaale ahaan, niman hubeeyan oo aan heybtooda la garaneyn ayaa ku afduubtay sadex shaqaale gargaar ah gudaha koofur Galbeed. Hey'adaha gargaarka ee caalamiga ahi waxa ay sii wadeen in ay ku tiirsanaadaan shaqaale Soomaali ah iyo ururada maxaliga ah si ay u gaarsiiyaan kaalmada gargaarka, gaar ahaan meelaha baadiyaha ee fog.

Sababtoo ah dagaalada u dhaxeeya Al-Shabaab, AMISOM iyo XDS, xayiraadda ay Al-Shabaab ku soo rogto helitaanka gargaarka, iyo canshuurta xoolaha nool, iyo amaan darada, dad badan oo degenaa meelaha ay Alshabaab maamusho ayaa keentay in ay u qaxeen xeryaha qaxootiga ee Kenya iyo Itoobiya iyo xeryaha barakacayaasha gudaha (IDP) ee kuyaala meelaha kale ee dalka. Maleeshiyoyinka ASWJ iyo ciidamada federaalka ayaa isku dhacayay sanadka oo dhan, iyadoo barakiciyay dadka rayidka ah.

Qeybta 2aad. Ixtiraamka Xoriyada Rayidka, oo ay ku jirto :

a. Xoriyada hadalka iyo saxaafada

Dastuurka federaalka ku meel gaark aha waxa uu bixinayaa xoriyada hadalka iyo saxaafada, laakiin masuuliyiinta federaalka iyo kan gobalada midna ma ixtiraamo xoriyadahas. Dowladda, masuuliyiinta la ologa ah dowladda, masuuliyiinta Somaliland iyo Puntland, MKKG,MKGM,IKJ,ASWJ,al-shabaab, iyo maliishiyaad aan la garaneyn ayaa dilay, tacadiyo u geestay, oo qashqashaaday suxufiyiinta iyada oo aan loo ciqabin (fiiri qeybta 1.a. iyo 1.g.).

Dastuurka Somaliland waxa uu mamnuucayaa daabacada iyo qeybinta warar la buunbuuniyay ama dhinac u janjeera oo keeni kara in ay carqaladeeyaan kala dambeeynta bulshada., saraakiishu waxa ay isticmaaleen qodobkaan si ay u soo eedeeyaan una xiraan suxufiyiinta.

Dastuurka Puntland waxa uu xadidaa xoriyada fakarka iyo cabirkeeda iyadoo loo marayo erayo xadidaad guud, iyada oo ay ku jirto u dhaqanka habdhaqan xurmo leh, degenaansho qaran, iyo xaqa shaqsiga ah ee kuwa kale--waxa ayna u ogolaataa in la qaado xaqa xoriyada hadalka marka lagu jiro xaaladaha dagaalka ama xaaladaha kale ee degdeg ah ee dadweynaha.

Xoriyada Hadalka iyo cabiraada : Dadka ku nool dhulalka ay gacanta ku heeyso waxa ay khatar ugu jiraan in laga aar goosto hadii ay waxa ka sheegaan saraakiisha dowlada, gaar ahaan marka ay ku eedeeyaan saraakiisha musuq-maasuq ama ay soo jeediyaan in saraakiishu in aysan awoodin in ay maareeyaan howlaha amaanka.

Xoriyada saxaafada iyo warbaahinta: Saxaafadda la daabaco waxa ay isugu jirtay mid kooban, wargeysyada madaxa banaan ee maalinlaha oo la koobiyeeyay, qaar badan oo ka mid ah waxaa leh dawladda magaaloooyinka waaweyn ayaana lagu daabacay. Dhowr ka mid ah kuwa la daabaco waxaa ku jira naqdin hogaamiyaasha siyaasadda iyo shaqsiyaad magaca leh.

Muwaadiniintu waxa ay inta badan wararka ka helaan idaacadaha ajnabiga ah iyo warbaahinta telefihinada. Sida laga soo xigtay Ururku Midowga Afrika qiyaastii ilaa 50 idaacadood ayaa ka hawlgala gobolada koonfurta iyo kuwa dhexe iyo mid hirarka gaagaaban oo Muqdisho ka hadasha. Sidi sanadihii hore oo kale, maamulka Somaliland waxa uu sii waday inuu mamnuucdo in la sameeyo idaacadaha madaxa banaan ee FMka. Inkasta oo ay jireen dhowr wargeys oo

madaxbanaan. Dhamaan idaacadaha FMka ee ku yaalay Somaliland waxaa lahaa dowladda. Ugu yaraan ilaa lix idaacadood oo madaxbanaan ayaa ka jiray Puntland.

Dawladda iyo maamul goboleedyadu waxa ay si si ku meel gaar ah u xireen warbaahinta, iyaga oo sabab uga dhigaya in ay sharaf dileen ama ay ku xadgudbeen madaxweynaha ama hogaamiyayaasha kale ee qaran.

Masuuliyiinta Somaliland waxa ay sii wadeen ganaaxa iyo xiritaanka aan loo meel dayin ee suxufiyiinta iyadoo loo heysto sharaf dilid iyo dambiya kale ee lagu soo eedeeyay, oo ay ku jiraan in ay la kulmeen asaxaabtooda. Intii u dhaxeysay Abril iyo Agoosto, masuuliyiinta Somaliland waxa ay xireen sagaal suxufi, oo uu kuu jiray mid la shaqeeynayay saldhig telefiskan oo ay dowladu leedahay., isagoo isku dayay in uu si gaar ah ula kulmo xubin ka tirsan xisbiga mucaaradka ah. Mudadda xabsigu waxa ay u dhexeysay dhowr maalin ilaa dhowr bilood iyo ganaax gaari karay ilaa 573,000 oo shilin (\$1000).

23kii Juun, Boliiska Puntland oo fulinaya amar ka soo baxay wasaarada warfaafinta ee Puntland ayaa xiray sarkaal ka tirsanaa Raadiyaha Daljir muddo hal asbuuc ah taasoo ka dambeysay kadib markii idaacadu ay wareeysatay Cabdisalaan Gallan oo horay u ahaan jiray gudoomiyaha Gobolka Bari, kaasoo la eryay markii uu kasoo horjeestay dowladda darteed. Warbaahinta maxaliga ayaa soo warisay in wasiir Maxamed Xassan Soocade uu soo way idaacada wareysiga ka dib oo ugu hanjab aargoosad rabshado wata wareysiga Gallan dartii.

Rabshado iyo Qashqashaad : Dowladu waxa ay dishay saxafi intii lagu jiray sanadka (fiiri qeybta 1.a.).

NISA waxa ay ku xirtay Muqdishu, Beledweyne, Jowhar iyo Kismaayo 16 saxafi intii lagu jiray sanadka. Sida banada waa la siidaayay iyada oo aan dacwad lagu soo oogin kadib markii ay bixiyeen ganaax.

Sida laga soo xigtay Ururka Suxufiyiinta Soomaaliyeed, masuuliyiinta maxaliga ah waxa ay sii wadeen in ay qashqashadaan iyo in ay si baahasan oo aan loo meel dayin ay u xiraan suxufiyiinta. Bishii Maajo, Boliiska Somaliland oo ka amar qaadanaya duqa magaalada Berbera waxa ay xireen dhowr suxufi oo uu ku jiray Cabdirashid Cabdiwahab Ibraahim madaxa wargeyska madaxa banaan ee Foor. Dowladu waxa ay ku eedeysay saxafiyiinta in ay soo wariyeen xubin ka tirtan golaha maxaliga degaanka Berbera oo shaki ka muujiyay heshiiska ka dhexeeyay Dowlada Somaliland iyo Dubai Ports World ee ku saabsanaa maareeynta dekada Berbera, isaga oo ku eeday in qoyska madaxweynuhu ay aqbaleen laaluush weyn

heshiiska dartiis.

Saxafiyiinta fadhigoodu ahaa Gobolka Jubada Hoose waxa ay sii wadeen in ay soo sheegaan in masuuliyiinta amaanka ee maxaliga ay qashqashaadeen.

20kii Agoosto, waxa ay xireen suxufi Somaliland ah Saciid Maxamuud Gahaeyr isaga oo daabacay maqaal, dhigayna baraha bulshada maqaal wax ka sheegayay masuuliyiinta Somaliland. 15kii Oktoobar Maxkamadda Gobolka Hargeysa ayaa sii deysay Gaheyr, iyada oo weysay cadeyn ku filan. Xeer ilaalinta ayaa ka qaadatay rafcaan deg deg ah, saxafiguna waa uu sii xiraa dhamaadka sanadka.

Al-Shabaab iyo koox aan la garaneyn ayaa dilay shan saxafi iyo iyaga oo qashqashaaday, una hanjabay kuwo kale. Suxufiyiintu waxa ay sheegaan in Alshabaab ugu hanjabto dil haddii aanay si wanaagsan uga hadlan weerarada lidka ku ah dawladda.

Faafreebka iyo Xakameynta ujeedada: Suxufiyiinta waxaa ay is mariyaan faafreeb adag si ay uga badbaadaan aargudasho.

30kii Agoosto, Gudoomiyaha Gobolka Hiiraan, Yuusuf Axmed Xagar ayaa ugu digay saxafiyiinta ku sugan baladweyne in ay wariyaan dhaqdhaqaaqada siyaasiyiinta ayan dowladu fasaxin ololohooda waxa uuna ugu hanjabay ciqaab kuwa ku guuldaerysta in ay raacaan.

Al-Shabaab waxa ay ka mamnuucday saxafiyiinta in ay tabiyaan wararka hoos u dhigaya shareecada islaamka sida ay u fasiraan al-Shabaab iyo waxa ay ka mamnuuceen dadka ku nool dhulalka hoos taga in ay dhageystaan warbaahinta caalamiga ah.

Magac xun u sameynta /Ceebeynta : Maamulada Puntland iyo Somaliland waxa ay sidoo kalé maxkamad ku soo taagaan suxufiyiinta sumcad dilid. Tusaale ahaan, intii lagu jiray Maajo ciidamada amaanka ee Somaliland waxa ay xireen Maxamed Maxamud Yusuf iyo Cabdirashid Cabdiwahab Ibrahim ---tifariraha iyo saxufiga sida ay u kala horeeyaan, wargeys madaxbanaan warbixin wax ka sheegeeysay dowlada darteed. Xeer ilaaliyaga guud ayaa ku soo oogay fal dambiyeed oo ay ku jirto daabacaada ‘ warar been ah ‘ iyo magac dilid iyo sumcad dilid madaxweynaha iyo marwada laad ee Somaliland. Labada nin waxaa lagu siidaayay damiin inii lagu jiray Juun.

Amaanka Qaranka: Masuuliyiinta dowladda dhexe iyo maamul goboleedyadu waxa ay qiil ka dhigtaan amaanka qaranka si ay u cadaadiyaan dhaliilaha, ugana hortagaan in warbaahintu ay ka hadlaan dadka ku jira mucaaradka siyaasadeed. Tusaale ahaan, 22kii Sebtember saraakiisha amaanka ee garoonka diyaaradahu waxa ay soo saareen hadal ka mamnuucaya wakiilada warbaahinta in ay soo galaan garoonka diyaaradaha muddo 60 maalmood ah, iyagoo sheegay in ay tahay arimo la xariira walwal xagga amaanka ah inta lagu jiro mudadda doorashada.

Xoriyadda Internetka

Masuuliyiintu waxa ay xadideen helitaanka internetka, laakiin ma jiraan warar lagu kalsoonaan karo oo sheegaya in dawladdu ay la socotay wadhadalka gaarka ee la isugu gudbiyo internetka iyada oo aan loo soo marin masuuliyiinta haboon ee sharciga.

Al-Shabaab waxa ay ka mamnuucday shirkadaha in ay adeegga internetka bixiyaan iyadoo shirkadaha isgaarsiinta ku qasabtay in ay ka xiraan adeegyada internetka goobaha ay gacanta ku heysay.

UNSOM waxa ay soo warisay kuwa bixiya adeegyada internetka (ISPs) ay bishii Febraayo ay xayireen 29 ka mid ah 35ta iyaga oo raacay amar uu soo saaray xeer ilaaliyaha guud Nofeember 2015 oo waajib uga dhigayay Wasaarada Boostada iyo Isgaarsiintu in ay xiraam 35 baraha internetka oo loo arkayay in ay khatar ku yihiin amaanka qaranka sababta oo ah wax ka sheegidooda dowlada. 35ta baraha internetka ee la tilmaamay, ISPs waxa ay diiday in ay xayirto lix baraha internetka ah oo xariir la lahaa al-Shabaab iyaga oo ku saleeyay in dowladu aysan awood u laheyn in ay ka difaacdo aargoosad.

Sida laga soo xigtay Ururka Isgaarsiinta Caalamiga ah, in ka yar 2 boqolkiba ayaa isticmaalay internetka sanadkii 2015kii.

Xoriyadda Aqoonta iyo Munaasabadaha Dhaqanka

Aqoonyahanadu waxa ay isku sameeyeen is faafreebid shaqsi ah.

Maamulka Puntland waxa uu waajib kaga dhigay in dadka sameynaya cilmi baarista fasax ka qaataan maamulka.

Marka laga reebo dhulka ay Al-Shabaab ay gacanta ku heyso, ma jirin xanibaad rasmi ah oo lagu soo rogay ka qeyb galka munaasabadaha dhaqanka, dhageysiga muusigga ama galitaanka shineemooyinka. Si kastaba ha ahaatee Xaaladda amaanka ayaa xadidday in la tago iyo abaabulka munaasabad dhaqanka ee gobolada koonfurta iyo dhexe.

b. Xoriyadda Isu Imaatinka nabadeed iyo Ururada

Xoriyadda Isu Imaatinka

Dastuurka fedraalka ee ku meel gaarka ah waxa uu bixiyaa xoriyada isu imaatinka, laakiin dowlada ayaa xadiday xaqaas. Guud ahaan, nabadgelyo darada ayaa sidoo kale si dhab ah u xadiday xaqaan. Masuuliyiinta federaalka iyo gobolada ayaa dilay dibad baxayaal (arag qeybta 1.a). Wasaarada federaalka ee amaanka gudaha ayaa sii waday in ay waajib uga dhigto fasaxooda dhamaan isu soo baxyada dadweynaha, iyaga oo qiil ka dhiganaya walwal xagga amaanka ah, sida khatarta weerar ay geystaan kuwa is miidaamiya ee al-Shabaab. Caburinta kulanada mucaaradka iyo isu imaatinka ayaa kordhay intii lagu jiray wareega doorashada, kaas oo bilaawday Agoosto siina socday ilaa dhamaadka sanadka.

9kii Julaay, Wasiirka Amaanka Gudaha ayaa siidaysay waraaq mamnuucaysa dhamaan kulanadda ka dhaca hoteelada muqdisho hadii aan marka ogolaansho laga helin wasaaradda. 19kii Sebtember, duqa magaalada Muqdishu Yuusuf Xasan Jimcaale ayaa sheegay in mudaaharaadyada mucaaradka aan la ogolaan doonin gudaha caasimada sababo la xiriira xagga amaanka, masuuliyiintu ku ma soo rogin wax xayiraad noocaas ah banaanbaxyadda dowladda.

Dowladda Somaliland waxa ay ka mamnuucday mucaaradka dibad baxyada siyaasadeed wixii ka baxsan inta lagu jiro mudadda doorashada, taasoo caadiyan bilaabata 45 maalin ka hor xiliga la qorsheeyay ololaha doorashada qaranka. Masuuliyiintu kuma soo rogin xayiraado noocaas ah banaanbaxyada taageerayaasha dowlada. 25kii Julaay, sida ay sheegeen Ururka Suxufiyiinta Somaliland, wasiirka qorsheynta qaranka ee Somaliland ayaa joojiyay sadex tababar oo loogu tala galay suxufiyiinta isaga oo uga aar goosanayay warbaahinta oo ku eedeysay in uu si xun u maareeyay Sanduuqa Horumarinta Somaliland.

Al Shabaab ma aanay ogolaan wax isu soo baxyo ah iyada oo aan ogolaasho horay loo heysan.

Xoriyadda Ururadda

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa bixiyaa xoriyadda ururada. Laakiin saraakiisha dowladu waxa ay qashqasheen shaqaalaha NGOyada. Waxaa kale oo jiray warbixino sheegaya in masuuliyiinta goboladu ay xadideen xoriyadda ururadu. Al-Shabaab uma ogolaan sida badan NGOyada caalamiga ahi in ay howlgalaan.

Dadka ku nool koonfurta iyo gobolada dhexe ee ka baxsan dhulka Al-Shabaab gacanta ku heyso waxa ay si xoriyad leh ugu biiri kareen ururada bulshada rayidka ah iyaga oo diirada saaray dhibaatooyin badan oo kala duwan. Guud ahaan, muwaadiniintu way ixtiraameen ururada bulshada rayidka ah awoodda ay u leeyihiin in ay bixiyaan adeegyada bulshada meelaha aan laheyn wasaarado dowladeed oo shaqeeynayay.

Maamul goboleedyadu waxa ay qaadeen talaabooyin ay ku xakameynayaan ama ay uga macaashaan heyadaha samafalka oo ay ka mid tahay in ay ku soo rogeen isdiiwaan soo noqnoqota ee heerarka kala duwan ee dowlada; isku dayay in ay kantaroolaan qandaraasyada samafalka iyo iibka iyo shaqaaleynta iyo canshuur maldahan oo aan cadeyn.

Qaar ka mid ah xubnaha ururadda bulshada rayidka ah ayaa ku eedeeyay ciidamada amaanka ee Puntland in ay fara gelin ku sameeyeen howlahooda siyaasadeed intii lagu jiray sanadka. Tusaale ahaan, intii lagu jiray Julaay masuuliyiintu waxa ay u xireen oo ay u hayeen Yacquub Maxamad Cabdalla, oo horay u ahaa wasiir, iyo agaasimaha NGO maxali ah inuu meel fagaare ah ka cambaareeyay diiwaanka horumarinta ee madaxweynaha Puntland.

c. Xoriyadda Diimaha

Eeg *Warbixinta Caalamiga Ah ee Xoriyadda Diimaha* ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee www.state.gov/religiousfreedomreport/

d. Xoriyadda Isu Socodka, barakacayaasha, Ilaalinta Qaxootiga iyo Dadka Aan dowlad Laheyn

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in dhamaan dadka si sharci ah u degan dalka gudahiisa ay xaq u leeyihiin xoriyad xagga dhadhaqaaqa iyo in ay dooran karaan degaankooda iyo in ay ka tagi karaan wadanka. Hase yeeshee xoriyadda dhaqdhaqaaqa waala xadiday meelaha qaar.

Tacadiyada Muhaajiriinta, Qaxooyiga iyo Dadka aan dal laheyn : Qaxootigu ma ay haysan in ay helaan badbaadin loo marayo hirgalinta sharciga iyo habka cadaalada. Qaxootigu waxa ay u soo gudbiyeen dhacdooyin baad, burcadnimo, iyo xadgudubyo xagga galmada ah Xafiiska Hey'adda Gudiga Sare ee Qaxootiga (UNHCR).

Dawladda iyo maamulka Somaliland waxa ay la shaqeeyeen Xafiiska Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) iyo Hay'adda Caalamiga ah ee Hijrada (IMO) si loo gargaaro barakacayaasha gudaha, qaxootiga, qaxootiga soo noqonaya, magangalyo doonka, dadka aan dhul laheyn iyo dadka kale ee walaaca laga qabo.

Intii lagu jiray sanadka wadhadalo ayaa u sii socoday haya'daha samafalka DFS iyo masuuliyiinta gobolada si loo qaado jid gooyooyinka loona fududeeyo isu gudubka gargaarka biniaadaminimo, raashinka gargaarka iyo badeecadaha lagama maarmaanka ah.

Isu-Socodka Gudaha Dalka : Jidgooyooyinka ay dhigtaan ciidamada dowladu, kooxaha la ologa ah, maleeshiyaadka hubeysan, garabyada qabaa'ilada iyo al-shabaab waxa ay diideen isu socodka, waxa ayna ku soo rogeen muwaadiniinta, baad, qashqashaad, rabshado iyo in ay bililiqeeystaan. Jid gooyooyinka ay dhigteen dhinacyada hubeysan iyo weerarada shaqaalaha samafalka ayaa aad u xadiday isu socodka iyo geeynta gargaarka qeybaha koofurta iyo bartamaha dalka.

Al-Shabaab iyo kuwa aan dowlada ka tirsaneeyn ee hubeysan waxa ay sii wadeen in ay ka mamnuucaan dhaqdhaqaaqada ganacsi meelaha ay gacanta ku hayeen ee ku yaalay gobolada Bakool, Baay, Gedo iyo Hiiraan, waxa ayna hor istaageen in la geeyo kaalmada bini'aadaminimo. Tusaale ahaan, 19kii Juun, rag hubeysan ayaa weeraray oo bililiqeestay kolonyo gaadiid ah oo qandaraas la lahaa hay'ad gargaar si ay u geeyaan raashin gargaar iyo waxyaalo kale gudaha gobolka Bakool, waxa ayna burburiyeen gawaaridii.

Weerarada ka dhanka ah shaqaalaha gargaarka iyo qalabkoodu waxa uu hor istaagay in la gaarsiyo kaalmo dadka aad u nugul. Todabadii bilood ee sanadka ugu horeeysay intii lagu jiray waxa jiray inn kabadan 90 dhacdo oo rabshado watay oo lala eegtay hey'adaha gargaarka, taas oo keentay in la dilo todoba shaqaale gargaar ah iyo sideed dhaawac ah. 10 waa la xiray, sadex waa la qafaashay, shana waxaa loo geestay dhib intii ay la hayay. 26kii Juulaay, shaqaale ka tirsanaa hey'adda qaramada midoobay ee UNHCR, 13ka tirsan shaqaalaha

Hey'adda Qaramada Midoobay u qaabilsan qaxootinga, iyo 11 shaqaale ilaalo u ahaa ayaa la dilay markii al-shabaab ay weerartay xero ku tiilay Muqdisho.

Somaliland waxa ay ka mamnuucday saraakiisha federaalka, oo ay ka mid yihiin kuwa ka soo jeeda Somaliland ee loo maleeynayay in ay ku matalaan danaha Hargeeysa gudaha Muqdishu, in ay soo galaan Somaliland. Waxa kale oo ay ka hor istaagtay in muwadiniinteedu u safraan Muqdisho si ay uga qeyb qaataan habka DFS ama dhaqdhaqaaqyada dhaqanka.

Saraakiisha MKGM waxa ay u diideen dadka degan in ay galaan Puntland, waxa ayna sii wadeen in ay xiraan darawalada wata taargada Puntland. Howshaad oo bilaabatay intii lagu jiray Janaayo 2015, markii horjooqe ka tirsanaa ciidanka nabad galyada wadooyinka ee Galmudug uu u sheegay in darawaliinta baabuurta wadata taargada Puntland la ganaaxayo, la xirayo, lana heynayo 24 saac.

Masuuliyiinta Puntland waxa ay sii wadeen in ay mamnuucaan in la marsiiyo dhulka waxyaalaha badeecada ah ee ka soo Dekada Berbera una socda magaalooyinka ku yaal Puntland oo ay ku jiraan Garoowe iyo Gaalkacyo. Xayiraadaas waxa ay xadiday awooda shaqaalaha gargaarka bini'aadmanimo ay u lahaayeen in ay gaarsiiyaan gargaarka biniaadminimo sida cuntada, qalabka talaalka xoolaha, waxyaalaha nafaqada ah iyo qalabka waxbarashada dadka nugul ee Puntland.

Safarada Dibadda: Tiro yar oo muwaadiiinta ah ayaa heli karay Baasaboorka. Iyadoo la eegayo sida baahsan ee ay u jiraan baasaboorada been abuur ah, dowlado badan oo ajnabi ah ma aqoonsana in baasaboorka Soomaaliga uu yahay dokumeenti sax ah oo lagu safri karo.

Barakacayaasha (IDPs)

Isku dhacyada, oo ay ka mid yihiin dagaalada u dhaxeeya maleeshiyada qabiilada ee gobolada Shabeelada Hoose, Galmudug iyo Hiiraan iyo abaaraha ayaa sababay in ka badan 1.1 milyan oo barakacayaal ah koofurta iyo bartamaha waddanka oo dhan, gaar ahaan gobolada koonfurta iyo kuwa dhexe. Ku dhawaad 400.000 oo ku barakacay gudaha ayaa degenaa gudaha Muqdisho.

Dad khasab looga soo masaafurinayo Sacuudi Carabiya ayaa sii socotay intii lagu

jiray sanadka; ku dhawaad 85,000 qof oo Soomaali ah ayaa khasab looga soo masaafuriyay Sacuud Carabiya ilaa 2013kii. Dad badan oo la soo celiyay ma ay awoodin in ay ku laabtaan meelihii ay asal ahaan ka soo jeedeen waxa ayna naqdeen dad ku barakacsan gudaha.

Dad Soomaali ah iyo muwaadiniin ka yimid wadama kale oo ka soo qaxay dagaalada Yemen ayaa qaxootinimo ka raadsady Soomaaliya. In kasta oo qulqulka ka imaanayay Yemen uu hoos u dhacay ilaa iyo Agoost 2015kii, inkabadan 35,000 oo qof ayaa u soo qaxay Soomaaliya ilaa Maarso 2015. Waxaa ku jiray in kaban 28,800 oo ah muwaadiniin Soomaaliyeed, 4,500 qaxooti reer Yemen ah iyo qiyaastii 300 muhaajiriin ah oo ka yimid dalal kale. Hey'adda Qaramada Midoobay ee Qaxootiga UNHCR ayaa xanaaneysay barakacayaasha gudaha waxa ayna siiyeen hoy ku meel gaar ah iyo kaalmo lacageed. Ilaa Maarso 2015 hey'adda IOM waxa ay gacan siisay in ka badan 10,500 oo yimid iyada oo siisay gaadiid ay ku gaaraan meesha ay u socdeen; sida ay u badnaayeen waxa ay u sii safreen Muqdisho.

Dowlada iyo maamul goboleedyadu waxa ay siiyeen dadka ku barakacay gudaha amaan galin yar iyo kaalmo yar iyagoo mararka qaar si toos ah uga qeyb qaatay barakicintooda. Tusaale ahaan dad gaar ah oo sheeganaaya dhulka iyo masuuliyiin dowlada ah, ayaa si joogta ah isugu dayay in ay si khasab ah ku saaraan dadka barakacayaasha ah gudaha magaalada Muqdisho. Qaar ka mid ah dadka ku barakacay gudaha ah iyo hey'adaha samafalka ayaa dhaleeceeyay masuuliyiinta maxaliga ah oo si xirfadeysan u taageeyay in khasab dib loogu dajiyo barakacayaasha gudaha meelo aan amaan aheyn gudaha Muqdisho. Masuuliyiinta Soomaalidu kama aanay hor tagin barakicinta khasabka ah ee dadka hoygooda looga saarayo lana geeynayo xeryo ku yaala banaanka magaalada.

Laga soo bilaabo Janaayo ilaa Agoosto, masuuliyiintu waxa ay si khasab ah ku saareen qiyaastii 91,000 oo qof oo badi ahaa barakacayaal gudaha ah ' in ka badan 78,000 waxaa dib loo dajiyay qeybta bartamaha koofurta ee dalka, gaar ahaan Muqdisho. Heysada dhulalka oo aan sugneyn iyo iyada oo ay koobneyd sida loo cadeeyn karo lahaanshaha dhuleed ayaa qeyb ka geystay qarada dadka khasabka looga saarayo guryahooda.

Abriil 2015 Human Rights Watch warbixin ay soo saartay ayaa waxa ay ku eedeysay ciidamaka boliiska Soomaaliyeed, xoogga NISA, ciidmada ilaalinta degaankuba ay xoog uga saareen bishii Maarso guryahii ay daganayeen 21,000 oo qof oo barakacayaal ah magaalada Muqdisho. Warbixintu waxa ay sheegtay in masuuliyiinta Soomaaliyeed ay garaaceen qaar ka mid ah dadkaas guryaha laga

saaray, baabi'iyeen hoygoodii, ayna uga tagteen biyo la'aan, cuno la'aan iyo la'aanta kaalmooyin kale. Sida ay warbixintu sheegtay, masuuliyiintu waxa ay ku guul dareysateen in ay siiso wargalin ku haboon iyo magdhaw bulshada ay la soo gudboonaatay in gurahooda oo laga saaro mana aysan siin dib u dejin sii socon karta ama fursad ay dib ugu midoobaan sida uu waajib ka dhigayo sharciga caalamaiga ah. Warbixintu waxa ay sheegtay in aanu jirin mid ka mid ah dadka loo wareystay warbixintan oo arkay amar qoraal rasmi ah oo looga saarayo, intooda badana ma aanay ogeyn guryo ka saaridda qorsheeynayd.

Ciidamada dawladda iyo maleeshiyada raacsan waxa ay bililiqeysteen oo ay iska kaashadeen weecsashada gargaarka bini'aadnimo ee loogu talo galay dadka Muqdisho degan. Ururada samafalka intooda badan horey ayey shaqaalahooda ugala baxeen oo ay hakiyeen qeybinta cuntada iyo dhaqdhaqaaqada kale ee la xiriira gargaarka dhulka ay gacanta ku heyso Al-Shabaab taasoo ay ugu wacan tahay dilalka joogtada ah, baadda, cago jugleynta iyo qashqashaada.

Ciidamada dawladda, maleeshiyada raacsan, rag xiran dharka ciidamada, iyo ciidamada AMISOM waxa ay u geysteen dhibaateyn la xariirta galmada oo ay ku jirtay kufis loo geystay barakacayaasha gudaha iyo hareeraha Muqdisho. Qaar badan oo ka mid ah dhibanayaashu waxa ay ahaayeen caruur. Dumar iyo caruurta ku noolaa xeryaha barakacayaasha gaar ahaan waxa ay aad ugu nuglaayeen in ay kufsadaan rag hubeysan, oo ay ku jiraan ciidamada dowlada iyo xubnaha maleeshiyoyinka. Ilaalada xeryaha barakacayaasha ayaa la sheegay in ay gabdho iyo dumar ku khasbeen falal galmo ah si ay ugu badashaan raashin iyo adeegyo ka jira xerayaha gudaheeda.

Ilaalinta Qaxootiga

Helitaanka Magangalyo : Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in qof kasta oo waddanka ka soo raadsada qaxootinimo uu xaq u leeyahay in aan dib loogu celin ama aan lageyn waddan kale oo qofkaasu uu ka qabo cabsi muuqata oo ah in la waxyeeleeyo. Ma jirto nidaam rasmi ah oo bixinayay badbaadin noocaas ah.

Somaliland waxa ay sii waday in ay diiwaan geliso dadka magangalyo doonka ah iyada oo gacan ka heleysa UNHCR. Wasaarada Dayactirka, Dib U dajinta iyo Dib U Dhiska ee Somaliland waxa ay heysatay ilo kooban waxa ay diiwaan gelisay wax ka yar 1000 qof oo soo galooti cusub iyo magangalyo doon ah intii lagu jiray sanadka. Mararka qaar, dawladda Somaliland waa ay diiday in ay diiwaangeliso dadka u dhashay Itoobiya iyo Eritariya ee magan gelyo doonka ah. Yaminiyiinta

qaar ka mid ah oo asalkoodu yahay Soomaali waxaa loo diiwaan galiyay in ay yihiin dad dib u soo laabtay badalkii qaxootinimada, taasoo ka soo weecisay bixinta kharajyada la xariira dib u dejinta Hey'ada Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) una soo wareejisay xakuumada Somaliland.

Helitaanka Shaqooyinka : Fursadaha shaqo ee qaxootig, Soomaalida soo laabatay iyo dadka kale ee nugul waxa ay ahaayeen kuwo kooban. Qaxootiga ka soo laabtay Keenya waxa ay soo sheegeen fursado shaqo oo kooban meelaha ay ku soo laabteen ee koofurta iyo bartamaha dalka.

Helitaanka Adeegyada Asaasiga ah : DFS waxa ay sii waday in ay la shaqeysi beesha caalamka si loo hagaajiyo helitaanka adeegyada assiga ah, shaqooyinka iyo xal waara oo loo helo barakacayaasha.

29kii Agoosto, MKJ ayaa hor istaagay dhamaan qaxootigii rabitaankooda uga soo laabanayay Kenya, iyagoo go'aankooda ku saleeyay in ay san jirin adeegyo loo heli karo iyo wax ay ku noolaadaan dadka soo noqonaya.

Qaxootiga iyo Soomaalida soo noqoneysay waa uu koobnaa helitaankooda adeegyada asaasiga ah. Xarumaha lagu qaabilo qaxootiga ee Somaliland oo uu adeegoodu liitay ayaa waxa ay keentay in qaar ka mid ah qaxootiga ay ku laabtaan Yaman sida la oo sheegay inkastoo colaaduhu ay ka ii socdeen.

Qeybta 3aad : Xoriyada ka qeyb qaadashada nidaamyada siyaasadeed.

Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu siiyaa muwaadiniinta awooda ay u leeyihiin in ay doortaan dowladooda iyagoo u maraya doorasho xiliyeed xur iyo xaq ah, oo lagu qabto cod bixin qarsoodi ah oo ku saleysan cod bixin siman oo loo simanyahay, laakiin muwaadiniintu ma aysan sameyn karin xaqaas.

Doorashooyinka iyo Ka Qeyb Galka Siyaasadeed

Doorashooyinkii Dhawaa : Intii lagu jiray 2015ka DFS waxa ay go'aansatay in aanay suurto gal aheyn in doorasho rasmi ah la qabto inta lagu jiro sanadka walaac xagga amaanka ah dartii; waxa xigay oo ay diyaarisay qorshe lagu galayo doorasho dadban oo ay sameeyaan wakiilo ay soo xusheen odayaashu. Doorashooyin aan toos aheyn ee aqalka hoose ee baarlamaanka, aqalka sare ee cusub, iyo madax weynaha ayaa la qorsheeyay Agoosto iyo Sebteembar, lama dhameeystrin dhamaadkii sanadka. Si kasta ha ahaatee, doorashada dadban ee aqalka hoose ee

baarlamaanka waxa ay ka balaarisay kuwa wax dooranaya 135 oday ilaa ergo ka kooban 14.025 oo ay soo doorteen odayaashu; 51 ergo oo ay soo xusheen odayaashu ayaa masuul ka ahaa in ay u codeeyaan kursi kasta oo ka mid ah aqalka hoose, ergadana waxaa laga doonayay in ay ku daraan 30 boqolkiiba (16) haween ah iyo 10 dhalin yaro ah. Inkasta oo 90 boqolkiiba doorashooyinka aqalka hoose iyo aqalka sare eey soo gabgaboobeen dhamaadka sanadka hadana doorashada hogaanka baarlamaanka iyo madaxweynuhu ma ay bilaaban dhamaadka sanadka. Eedeymo la xariira codad la iibsaday, cabsi galin, hanjabaad, faragalin ay sameeyeen saraakiisha federaalka iyo gobolada, rabshado, iyo afduub ayaa ahaa kuwa baahsan doorashada ka hor.

Intii lagu jiray 2012 DFK waxa ay dhameystirtay jidkii khariidada ee 2011si loo dhameeyo ku meel gaarnimada, iyaga oo la kaashanaaya wakiilo ka socda Puntland, Galmudug, ASWJ iyo beesha caalamka. Waxaa habkaas ku jiray dhameystirka dastuurka federaalka ku meel gaarka ah, sameynta 825 xubnood oo metala Golaha Wakiilada Qaranka (NCA) oo ansixiyay dastuurka ku meel gaarka ah, xulashada 275 xubnood ee baarlamaanka federaalka, iyo qabashada doorashada af hayeenka baarlamaanka iyo madax weynaha. DFS waxaa loo qabtay in ay dib u eegis ku sameeyso ayna wax ka badasho dastuurka ku meel gaarka ah, ayna u soo bandhigtoin lagu ansixiyo codbixin qaran dhamaadka sanadka. Laakiin habkaas lama dhameystrin.

Sida uu qabay habka wadada khariidada ee 2012kii 135 oday dhaqameed ayaa la isugu keenay Muqdisho si ay u magacaabaan xubnaha NCAda oo ka kooban 825 si ay u tixgaliyaan dastuurka ku meelka gaarka ah. Odayaashu sidoo kale waxa ay magacaabeen xubnaha 275ka ah ee baarlamaanka dawladda dhexe ee afarta sano ee soo socota sida uu dhigayo dastuurka ku meel gaarka ah. Waxaa jiro eedo la xiriir laaluush iyo cabsi galin ka jirtay markii la soo xulayay 135 oday iyo magacaabista xubnaha baarlamaanka, laakiin guud ahaan saxiixayaashii khariidada iyo kuwa kalaba waxa ay u arkayeen xubnaha baarlamaanku in ay yihiin kuwo si guud u metelayay bulshada oo dhan.

Iyada oo ay goob joog ka ahaayeen kormeerayaal caalami ah, baarlamaanka ayaa 2012 qabtay doorasho dadban oo madaxweyne oo ku dhacday codeyn qarsoodi ah oo Xasan Shiikh Maxamuud kaga adkaaday madaxweynihii dowlada ku meel gaar ahaa ee talada hayay Shiikh Shariif wareegii labaad uguna dambeeyay ee codeynta. Waxaa jira warbixino aan la cadeyih oo ah in musharixiinta madaxweynuhu ay laaluusheen mudanayaasha baarlamaanka si ay codkooda ugu badashaan. Shiikh Shariif ayaa qirtay in laga adkaaday waxa uuna ku tilmaamay doorashada mid cadaalad ah.

Sharciga Somaliland waxa uu ka hor istaagayaa muwaadiniinta degan goboladeeda in ay ka qeyb qaataan hababka la xariira DFS.

Gudaha Puntland 2012kii waxa uu baarlamaanku golaha mudanayaashu si aqlabiyad ah ku aqbalay dastuurka gobolka kaas oo dhowraya nidaamka siyaasdeed ee xisbiyada badan. Intii lagu jiray 2014kii Cabdiwali Maxamed Cali ayaa wareegii u dambeeyay ee doorasho kaga adkaaday Madaxweyne Faroole hal cod kaliya, iyada oo doorashada si toos ah looga daawanayey telefishanka iyo raadiyayaasha. Madaxweyne Faroole wuu ogolaaday natiijada. Baarlamaanku waxa kale oo uu u doortay Cabdikahim Cabdullaahi madaxweyne ku xigeenka cusub.

Baarlamaanka Maamulka Ku Meel Gaar ah ee Koofur Galbeed ayaa la sameeyay 2015kii, ka dib kulankii 2014tii lagu sameenyay gobolka, kaas oo u codeeyay Shariif Xasan Shiikh Aadan inuu noqdo madaxweynihii u horeeyay ee maamulka ku meel gaarka ah.

Intii lagu jiray 2015 DFS waxa ay si rasmi ah u caleemo saaray 89 xubnood oo golaha Maamulka Ku meel gaarka Ah ee Galmudug (IGA). 89 xubnood waxaa soo xushay 40 oday dhaqameedyo ah oo matalaya 11qabiil hoosaad. July 2015kii golaha ayaa Cabdikarim Xuseen Guuleed u doortay madaxweynihii ugu horeeyey ee MKGM. ASWJ way diiday in ay natiijada doorashada aqoonsato waxa ayna iskood si gooni ah u sameeysteen mamul qeybaha ay gacanta ku hayeen ee MKGM.

Somaliland doorasho baarlamaan oo la qabtay waxaa ugu dambeysay 2005tii waqtigeediina waa la dhaafay. Madaxweynaha Somaliland Axmed Maxamed Maxamuud “Siilaanyo” waxaa la doortay 2010kii. Korjoogayaal caalami ah iyo kuwa guduhuba waxa ay sheegeen in doorashadu ay aheyd mid cadaalad ku dhacday oo xor ah. Baralamaanka Somaliland waa mid ka kooban laba gole oo ka kooban 82 xubnood oo la soo magacaabay ee aqalka odayaasha, loona yaqaan Guurti, iyo 82 xubnood oo ah xubnaha aqalka wakiilada oo la soo doortay oo u matala qabiilada si isu dheelitiran. Abriil aqalka odayaashu waxa uu u codeeyey in dib loo dhigo doorashada horay u daahday ee aqalka wakiilada iyo madaxweynaha ilaa Maarso 2017ka. Si kastaba ha ahaatee 10kii Sebtember ayuu ku dhawaaqay in doorashada baarlamaanka iyo tan madaxweynaha la kala saaray taasoo keentay dib u dhac kale oo ku yimaada doorashadii baarlamaanka iyo mudo kale oo xil kordhin ah. Taariikh cusub oo la qabanayo doorashada baarlamaanka wali lama qaban

dhamaadkii sanadka. Waxaa jiray eedeeymo in Aqalka Odayaashu uu ku lug laaga musuqmaasuq siyaasadeed. Iyo saameyn aan habooneyn.

Intii lagu jiray 2013 DFS iyo wafdi ka socda Jubbaland ayaa kala saxiixday heshiis keenay in DFS ay si rasmi ah u aqoonsato MKJ ee mardhaw la sameeyay. Axmed Maxamed Islaam ‘‘madoobe’’ ayaa loogu doortay madaxweyne kulankii odayaasha iyo wakiilada ee dhacay 2013kii.

Intii lagu jiray Janaayo DFS ayaa bilaawday shir gobol loogu abuurayo gobolada Hiiraan iyo Shabeelada Dhexe, kaas oo ahaa gobolkii ugu dambeeyay ee xubin ka noqonaya federaalka ee laga sameeyo gudaha habka federaalka. Habkaas waxaa uu ku soo gabagaboobay dhismaha Hirshabeelle bishii Oktoobar, dhismihii baarlamaanka Hirshabeelle 10kii Oktoobar, iyo doorashadii maxaxweynaha Hirshabeelle Cali Cabdullahi Cosoble 17kii Oktoobar. Habka dhismaha gobolka waxa waxyeleeyay eedeeymo ah in madaxweynaha DFS uu faragaliyay habka ay u socotay si ay u saameeyso doorashada madaxweyne isaga oo taageerayaashiisa uga magacaabay xilal muhiim ah gudaha maamulka cusub iyo isaga oo siiyay masilaad weyn qabiilkiisa hoose. Hogaamiyaha dhaqanka ee Xawaadle oo ah dad badan oo dega Hiiraan, ayaa diiday in uu ka qeyb qaato.

Al-Shabaab waxa ay mamnuucday dadka rayidka ah ee dhulka ay gacanta ku heyso in ay bedelaan maamuladooda Al-Shabab. Qaar ka mid ah maamulada Al-Shabaab, hase yeeshee, waxa ay kala tashadeen odoyaasha dhaqanka ee degaanka arimo gaar ah waxa ayna u ogolaadeen in ay sii jiraan oo sii shaqeeyaan gudiyadii horey u jiray ee degmada.

Xisbiyada Siyaasadeed iyo Ka Qeybgalka Siyaasadda: Bishii Sebtember madaxweynaha ayaa saxiixay sharciga xisbiyada siyaasadeed, kasoo abuuray qaabkii ugu horeeyay ee xisbiyo siyaasadeed oo sharci ah ilaa 1969kii, markii madaxweynihii hore Siyad Bare uu mamnuucay dhaqdhaqaaqada siyaasadeed kadib markuu talada kula wareegay inqilaab. ka hor Sebtember, si kastaba ha ahaatee, dhowr urur siyaasadeed ayaa u howlgalayay sidii xisbiyo. Tusaale ahaan, madaxweynaha DFS waxa uu sheegtay in laga soo doortay Xisbiga Nabadda Iyo Horumarinta 2012. Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in muwaadin kasta uu xaq u leeyihiin in ay ka qeyb qaataan arrimaha dadweynaha oo ay ka mid tahay xaqqa abuuritaanka xisbiyo siyaasadeed, ka qeyb galka howladooda, iyo in loo doorto xil kasta oo gudaha xisbiga siyaasadeed.

Dastuurka Somaliland iyo Puntland iyo sharciyadooda doorashadu waxa ay tirada

xisbiyada siyaasadeed ku xadideen ilaa sadex xisbi waxayna u dajiyeen shuruudo ku saabsan barnaamijyadooda siyaasadeed, maaliyadda iyo dastuuradooda.

22kii Feberaayo, ciidamada amaanka ayaa si aan loo meel dayin u xiray gudoomiye ku xigeenkii Golaha Dib uhabeynta siyaasadeed ee Banaadiri kadib isu soo bax dadweyne ee taageerayaashooda gudaha Muqdishu si ay ugu doodaan xaqqa bulshada banaadiriga. Isaga waxaa la sii daayay sadex maalin kadib.

Ka qeyb qaadashada Dumarka iyo Dadka Laga Tirada Badan Yahay: Ma jiro sharci xadidaya ka qeyb qaadashada haweenka ee hababka siyaadadeed. Arimaha dhaqanka ayaa si kastaba ha ahaatee xadida ka qeyb galka haweenka. Inkasta oo saxiixayaashii khariidada jidka ay isku waafaqeen in haweenku ugu yaraan ay qaataan 30 boqolkiiba kuraasta baarlamaanka ka hor inta uusan wadanku u gudbin xakuumad rasmi ah, haweenku waxa ay hayeen kaliya 14 boqolkiiba 275ta kursi ee baarlamaanka. Si kastabab ha ahaatee dadaaladii ahaa in lagu qaabeeyo doorashooyinka dadban si ay u gaaraan qoondada 30 boqolkiiba waxay ay iska caabin adag kala kulantay, odayaasha qabiilada, hogaamiyayaasha siyaasadeed iyo hogaamiyayaasha diinta, wakiilda haweenka ee baarlamaanku waxa ay kordheen ilaa 25 boqolkiiba. 26ka xubnood ee golaha wasiirada waxaa ku jiray kaliya hal dumar ah kadib markii wasiirad haween ah ay is casishay intii lagu jiray sanadka, tii labaadna xilka ayaa laga qaaday; labadaba waxaa badalay rag.

Ururada bulshada rayidka ah, qabiilada laga tirada badan yahay iyo maamulka Puntland way ku baaqeen in la baabiyo "nidaamka 4.5" kaasoo matalaada siyaasadda loo qeybsaday afarta qabiil ee waaweyn, iyo dhamaan qabiilada laga tirada badan yahay oo la siiyay "0.5" soo haray. Nidaamka waxa uu meel u dhigay qabiilada laga tiro badan yahay tiro go'an iyo kuraas yar oo ay ku yeeshaan baarlamaanka federaalka ah. Sida uu qabo dastuurka ku meel gaarka ah, habka doorashada waxaa looga dan lahaa inuu noqdo mid toos ah, sidaa aawgeed looga weecdo qaacidada 4.5, laakiin hogaamiyayaasha federaalka iyo gobolada ayaa go'aansaday Abriil in lagu laabto qaacidadii 4.5 oo lagu go'aansado waxa uu ka koobnaanaayo aqalka hoose. Ra'iisul wasaarihii hore Cabdiwali iyo Ra'iisul Wasaare Sharmaarke ayaa si waday isla qeybtaa xagga matalaada dadka laga tirada badan yahay markii eey kordhiyeen golaha wasiirada, ilaa Juun, markii laba ka mid ah sadexda haween ee wasiirada ahaa lagu badalay rag.

Somaliland waxaa ku jiray laba haween ah 86ka xubnood ee Aqalka Wakiilada. Haweeneyda kaliya ee ku jirta Golaha Guurtida waxa ay ku heshay ka dib markii odeygeedii, oo horey uga tirsanaa golaha, uu iska casilay 2012. Dhaqan ahaan haweenka waa laga reebay Golaha Guurtida. Laba qof dumar ah ayaa ku jiray

golaha wasiirada ee ka kooban 24 wasiir.

Qof dumar ah ayaa gudoomiye ka ah Gudiga Xuquuqda Aadana ee Somaliland. Halka qof dhalinyaro ah oo ka socda dadka lagada tirada badanyahay uu ahaa gudoomiye ku xigeen. Madaxweynaha Somaliland waxa uu lahaa la taliye dhibaataada dadka laga tiro badan yahay. Bishii Agoosto madaxweyne Siilaanyo waxa uu magacaabay xubin ka tirsan Dhulbahante, qabiil siyaasad ahaan lagu xaqiro gudaha Somaliland, in uu hogaamiyo wasaaradda arimaha gudaha, oo masuul ka ah cabashooyinka ku saabsan xaqiraadaha bulshooyinka laga tirada badan yahay ee Sool iyo Sanaag.

Haweenku marna xubno kama noqon Golaha Odoyaasha ee Puntland. Odayaasha dhaqanka, oo dhamaan ahaa rag, ayaa doortay xubnaha Aqalka Wakiilada ee Puntland. Laba dumar ah ayaa ku jira 66ka xubnood ee Aqalka Wakiilada. Wasiirka Dumarka iyo Arrimaha Qoyska iyo Wasiirka Dastuurka, Arrimaha Federaalka iyo Dimuqaraadiyadda ayaa ahaa dumar. Sagaalka xubnood ee gudiga doorashada waxaa ku jiray hal qof oo dumar ah.

Qeybta 4aad. Musuqmaasuqa iyo Furfurnaanta oo ka maqan dowlada

Saraakiishu dowladu waxa ay si joogta ah ugu lug yeesheen musuqmaasuq. Sharcigu waxa uu dusha kaga ridayaa ciqaab dambiyeed saraakiisha la timaada musuqmaasuq. Laakiin, dawladdu si haboon uma aanay dhaqangelin sharciga. Oktoobar 2015kii Kooxda La Socoshada Soomaaliya iyo Eritareeya (SEMG) ayaa sheegay “ka sareeynta sharciga oo muuqata oo ay ku naaloodaan kuwa ku lug yeesha isdaba marinta lacagaha dowlada in ay sii dabadheereysay dhaqan musuqmaasuq gudaha siyaasadaha Soomaaliya”

Musuqmaasuqa: Bishii Maajo saraakiil xukuumada ka tirsan ayaa sheegay in dib u eegis gudaha ah oo ay dowladu shaqaaleysay oo ku saabsanaa heshiisyadii ay Soma Oil and Gas Company ay gashay aanay helin wax khaladaad ah. 2015kii kooxda la socota Somalia iyo Eritareeya (SEMG) ayaa wax ku kordhiyay warbixin ay diiwaan galisay oo ahayd in Soma ay bixisay in ka badan nus milyuun doolar (oo u dhigantay 286 bilyan oo shilinka Soomaaliga ah) shaqaale jagooyin sare ka haya Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta iyado oo loogu yeeray ‘ heshiiska awood dhisida’. Sida ku qoran warbixinta, dhowr sarkaal oo ka tirsan wasaaradda ayaa kawada qaadanayay mushaaroyin DFS iyo Soma Oil and Gas. Dowladu ma aanay sii deyn dib u eegistooda, lamana eryin cid ka mid ah shaqaalihii mushaarka ka qaadanaayay Soma ama dowladda.

Gudiga Maamulka Lagacta (FGC)—guddi la talin oo aan la heyn awood sharciyeed laakiin masuul ka ah dib u eegida dhamaan qandaraasyada dowlada oo ka badan 2.8 bilyan oo shilinka Soomaaliga (shan malyan oo doolar) oo ka koobnaa lix xubnood oo DFS iyo afar ergo oo ay maalgaliyeen ururada lacagaha ee caalamku. Inkasta oofulinta wasaaradaha dowlad dhaxdeeda, waaxaha, iyo hay'aduhu ay sii hagaagayeen, wasaaradaha qaar ayaa dhinac maray FGC markii ay ka gorgortameeyeen qandaraasyada muhiimka ah ee dowlada.

Kooxda La Socoshada Soomaaliya iyo Eritareya waxa ay sii wadatay warbixino dhoofinta dhuxusha taasoo lagu jabiyay xayiraadii Golaha Amaanka ee QM. Soo saarka iyo dhoofinta dhuxsha ayaa ka sii socday dhulka ay gacanta ku hayaan Al-Shabaab, MKJ iyo ciidamada Kenya ee AMISOM, sida badan dhoofinta sharci darada ah waxa ay ka timid Kismaayo, sida ay sheegtay Kooxda La Socoshada Soomaaliya iyo Eretareeya.

Somaliland waxa ay laheyd hanti dhawr qaran iyo guddoon iyo gudiga la dagaalanka musuqmaasuqa oo uu magaacabay madaxweynaha Somaliland. Somaliland marna kuma soo oogin saraakiil Somaliland ah wax dacwad musuqmaasuq ah.

Gudiga maamul wanaaga iyo la dagaalanka musuqmaasuqa ee Puntland marna kama ay baarin wax musuq maasuq saraakiisha Puntland ah.

Al-Shabaab waxa ay "Zakat" (Waajib saaran muslimiinta in ay sadaqo bixiyaan Ramadaanka) baad ah oo aad u sareeya, aana la saadaalin karin iyo Sadaqo (lacag aan khasab ahayn oo muslimiintu ay la baxaan) canshuur ka aruuriyeen dhulka ay gacanta ku hayaan. Al-Shabaab Waxa kale oo ay weecsadeen oo ay xadeen cunada gargaarka bini'aadaminimo.

Sheegitaanka Maaliyadda : Sharcigu wajib kama dhigayo in saraakiisha la magacaabo ama la doorto ay cadeeyaan hantida ay leeyihiin.

Wararka ay Dadweynuhu Heli Karin: Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa in muwaadiniintu ay xaq u leeyihiin helitaanka macluumaadka ay dawladdu heyso. Waxa kale oo uu dhigayaa in baarlamaanku uu soo saaro sharci lagu dhaqan gelinayo xuquuqdaas, laakiin baarlamaanku ma aanu ansixin sharci noocaas ah ilaa dhamaadkii sanadka.

Qeybta 5aad. Dareenka Dawaladda ee Baaritaanada ay Sameeyeen

baarayaasha caalamka iyo kuwa aan dowliga aheyn ee Ku Saabsan Xadgudubka Xuquuqda Aadanaha

Dhawr ka mid ah ururada gudaha iyo kuwa caalamiga ah ee xuquuqda aadanaha ee ka howl galay goobaha ka baxsan dhulka ay Al Shabaab gacanta ku heyso, ayaa baaritaan ku sameeyey oo daabacay waxyaabaha ay ka ogaadan kiisaska xuquuqda aadanaha. Saraakiisha dowladu ilaa xad way la shaqeynayaan kana jawaabeen aragrigooda, inakstoo ay sidoo kale qashqashaadeen NGOyada. Walaac xagga aminga ayaa xakameeyay awooda NGOyada in ay ka shaqeeyaan degaannada koofurta iyo bartamaha. 8dii Juun, tusaale ahaan, nin hubeeyan oo aan la garaneyn ayaa gudaha Gaalkacyo ku toogtay kuna dilay qof madax ka ahaa NGO (fiiri, qeybta 1.a.). NGOyada caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah guud ahaan waxa ay ka shaqeeyaan Somaliland iyo Puntland iyadoo aanay cidina xadidaad weyn ku sameyn.

Masuuliyiinta ayaa mararka qaar qashqashaaday oo aan la shaqeyn NGOyada. Tusaale ahaan, arrimaha la xiriira musuqmaasuqa saraakiisha, dawladdu si joogta ah ayey u beenisaa waxyaabaha ay ogaadaan hay'adaha NGOyada caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah iyo sidoo kale hanti dhawrka gudaha.

Heyadaha Xuquuqada Aadanaha ee Dawladda: Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah ee waxa uu dhigayaa abuuritaanka guddi madax banaan oo xuquuqda aadanaha ah iyo runta iyo gudiga dib u heshiisiinta muddo 45 cisho iyo 30 cisho gudahood ah sida ay u kala horeeyaan ka dib magacaabista golaha wasiirada ee 2012ka. 14kii Agoosto, madaxweynaha DFS ayaa u saxiixay qodobka gudiga xaquuqul insaanka sharci ahaan, inkastoo aan gudiga la magacaabin ilaa dhamaadkii sanadka. Waxba lagama qaban gudigii runta iyo dib u heshiisiinta ee la soo jeediyay ilaa dhamaadkii sanadka.

Kheyraadka oo kooban iyo waayo aragnimo la'aanta madaxda hay'adaha ayaa xadiday taabo galnimada Gudiga Xuquuqda Aadanaha ee Somaliland iyo Xafiiska Difaaca Xaquuqul Insaanka ee Puntland.

Qeybta 6aad. Heyb Sooca, Xadgudubka Bulshada iyo Tahriibinta dadka

Dumarka

Kufsigu iyo Rabshadaha Qoyska : Sharcigu waxa uu ka dhigayaa kufsigu dambi, waxa uuna keenayaa ciqaab dhan shan ilaa shan iyo toban sano oo xarig ah. Xukunada maxkamadaha ciidamada ku riday kufsigu waxaa ku jiray dil.

Dawladdu si waxtar leh uma dhaqan gelin sharcigan. Ma jiraan sharciyo liddi ku ah gacan ka hadalka dadka is qaba, oo kufsigu ka mid yahay, inkasta oo 27kii Meey golaha wasiiradu ay ansixiyeen siyaasad qaranka ee la xariirta xagga jinsiga taas oo siinaysa dowlada xaqqa in ay dacwad kusoo eegto. Qof kasta oo lagu helay rabshado la xariira xagga jinsiga, sida dilalka iyo kufsiga haweenka. NGOyada waxa ay diiwaan galiyeen dhacdooyin kufsi oo soo noqnoqda iyadoo aan sharciga la hor keenin kuwa geystay, gaar ahaan haweenka barakacayaasha ah iyo dadka u dhashay qabiilada laga tirada badan yahay.

Inkasta oo tiro koobka rabshadaha jinsiga ku dhisan ee Muqdisho ay ahaayeen kuwo aan lagu kalsoonaan karin, NGOyada caalamiga ah iyo kuwa maxaliga ah waxa ay ku tilaamaameen rabshadaha noocaas ah kuwo aad u baahsan. Ciidamada dawladda, maleeshiyada, iyo rag xiran dharka ciidaada ayaa kufsaday gabdhaha iyo dumarka. Inkastoo ay ciidamadu xireen qaar ka mid ah ciidamada amaanka oo lagu eedeeyey kufsi, sharciga oo aan qaban ayaa noqday wax iska caadi ah.

Ciidamada AMISOM waxa ay geysteen xad gudub galmoodka ah iyo dhiigmiirad uu ku jiro kufsigu.

Haweenku waxa ay ka baqeen in ay soo sheegaan kufsi suragalnimada in laga aar goosto darteed. Boliisku waxa ay ka cagajiideen in ay baaraan, mararka qaarna waxa ay weydiiyeen dhibanayaasha in ay ku sameeyaan howlaha baaritaanka ee kiisaskooda. Dhaqan ahaan qaabka loola dhaqmo kufsiga ayaa ah mid iska indha tira xaalada dhibanaha, halkeediina waxa ay raadiyaan xal ama magdhaw laga bixiyo kufsiga iyada oo loo marayo gorgortan u dhaxeeya xubnaha qabaa'lada ee dhagar qabaha iyo dhibanaha. Dhibanayaasha qaar ayaa lagu khasbay in ay guursadaan dhagar qabayaasha.

Sida badan, masuuliyiintu waa dhif in ay isticmaalaan qaab rasmi ah oo wax looga qabto kufsiga. Dhibanayaasha waxaa u sii raaca in uu soo gaaro takoor ku saleysan iyada oo loo arko in aysan daahir aheyn.

Ururada gudaha ee bulshada rayidka ah ayaa gudaha Somaliland ka soo sheegay in kufsi wadareedku uu ahaa dhibaato sii socotay meelaha magaaloooyinka ah, iyadoo gaar ahaa ay geestaan dhalin yarada qowleysata iyo ardayda labka ah. Inta badan waxa ay ka dhacday xaafadaha aad saboolka u ah iyo gudaha dadka muhaajiriinta ah, qaxootiga dib u soo laabanaya, iyo dadka reer guuraaha ah ee soo barakacay ee ku nool magaaloooyinka. Boqolkiiba 55 kiisaska la soo sheegay, dhibanuhu ma aheyn qaan gaar. Kiisas badana lama soo sheegin.

Rabshadaha guryaha iyo galmada ee loo geysto dumarku waxay ahayd dhibaato aad u culus. Inkasta oo qodob ka mid ah dastuurku uu mamnuuc ka dhigayo rabshadaha nuuc kasta ee dumarka loo geysto. Inkastoo shareecada iyo dhaqanka labaduba ay wax ka qabtaan xalinta khilaafaadka qoyska, dumarka lagama qeyb gelin habka go'aanada loo gaaro.

Al-Shabaab waxa ay sidoo kale geysatay rabshado xagga galmada ah, oo uu ku jirto guurka khasabka ah, Al-Shabaab waxa ay dad ku riday xukun dil ah iyaga oo geeystay kufsi.

Gudniinka Fircooniga ah /Googynta : Inkastoo qodob ka mid ah datuurku uu ku qeexayo gudniinka haweenku inuu yahay mid arxan daro ah, oo bahdil ah, uuna la simayo jirdil, uuna mamnuucayo gudniinka fircooniga ah iyo gooyntu hadana waa mid waddanka oo dhan lagaga dhaqmay si baahsan. UNICEF waxa ay sheegtay in 98 boqolkiiba ay gabdhaha iyo dumarka lagu sameeyay gudniinka fircooniga ah /gooynta intooda waxa lagu sameeyay qodbid – noocyada ugu xun - kasoo ah inta la jaro hadana la isku tolo xubinta taranka. Ugu yaraan 80 boqolkiiba gabdhaha Soomaaliyeed ee maray gudniinka fircooniga ah iyo goynta waxa da'doodu u dhaxeeyso shan ilaa 14. NGOyada caalamiga ah iyo kuwa guduhu waxa ay sameeyeen barnaamijyo waxbarasho wacyi galin ah oo ku saabsan khatarta gudniinka fircooniga iyo gooynta, laakiin ma jiro tirakoob lagu tiirsanaan karo oo lagu cabiro guushooda. Bishii Maarso gudaheeda ra'iisul wasaaraha ayaa sheegay taageerada uu u haayoo olole caalamiga ah, oo ay hor kacayeen kooxda u dhaqdhaqaaqda ee Avaas, si loo dhiiri galiyo in dalku qaato qaabka aan loogu dulqaadan karain gudniinka fircooniga ah iyo gooynta marnaba. Ololuhu waxa uu soo aruuriyay in ka badan 1.3 milyan oo saxiix.

Dhaqamada Kale ee Dhibaata Leh: Gogol dhaafka dhulalka ay Al-Shabaab waxa ay ciqaabtiisu aheyd dil. Si ka duwan sanadihii hore, lama soo sheegi warbix ku saabsan haweeney lagu dilay dhagax gogol dhaaf dartii.

Dhibaateynta Galmada : Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu leeyahay shaqaalaha , gaar ahaan haweenka , waa in ay lahaadaan xaquuq gaar ah oo ka ilaalinayasa in loo geysto xadgudub galmo iyo takoor. Inkasta oo ay taasi jirto, dhibaateynta galmada ayaa la aaminsanaa in ay aheyd mid aad u baahsan. Ma jirin warar ku saabsan barnaamijyada dowlada ee wax ka qabashada dhibaateynta galmada.

Xuquuqda Dhalmada: Ninka qaba xaaska ayaa inta badan go'aanka ka gaara dhalmada labada is qabta. Dumarka waxa ay u lahaayeen awood yar in ay si xor a u go'aansadaan iyo masuuliyadda tirada caruurta, kala dheereynta dhalaanka, iyo waqtiga ay caruur dhalayaan iyo maareynta caafimaadka taranka, sidoo kale waxa ay ka heeysteen macluumaad kooban oo ku saabsan waxyaalaha dhalmada la isaga joojiyo ama helitaankooda. Sida ay sheegtay Qaramada Midoobay, qiyaastii 15 boqolkiiba gabdhaha iyo dumarka da'doodu u dhaxeeyso 15 ilaa 49 ayaa isticmaalay nooc ka mid ah qaababka looga hor tago uurka. Waxa ay aheyd naadir in dumarku ay helaan xirfadlayaal caafimaad xiliga uurka iyo dhalmada, iyo daryeelka degdeg ah haddii xaalad adag ay ka timaado soo riditaanka ilmaha, ama daryeelka uureyda iyo dhalmada ka dib.

Qaramada Midoobay waxa ay sheegtay in ka badan 80 boqolkiiba haweenka barakayaashu aanay helin daryeelka dhalmada oo amaan ah. Heerka dhimashada ee xiliga dhalmadu waxa uu ahaa 732 oo caruur ah 100,000 kasta ee nolol ku dhasha tasoo ka dhalata murugsanana la xiriira foosha oo ay ka mid tahay dhiig yaro , gudniinka fircooniga ah iyo daryeel caafimaad la'aan. Tani waxa ay ka dhigantahay horukac ilaa 2010kii markii heerka isu dhiganku uu ahaa 850 caruur ah 100,000 nolol ku dhasha. Mid ka mid ah 18kii haween ayaa khatar ugu jirta in ay umul raacato nolosheeda.

Takoor: Dumarka ma aanay helin xaquuq la mid ah tan ragga, waxa ayna la kulmeen in ay ka hooseeyaan ragga, inkasta oo qodob ku jira dastuurka federaalku oo mamnuucayo faquuqa noocaas oo kale ah. Haweenku waxa ay la kulmeen faquuq deymaha, waxbarashada, siyaasada iyo guryaha.

27kii Maajo, golaha wasiirada ayaa ansixiyay siyaasad qorshe qaran si loo kordhiyo ka qeyb galka haweenka, awoodsiin dhaqaale,iyo waxbarashada gabdhaha.Qorshaha waxa ku jiray barnaamij kor loogu qaadayo ku baraarugsanaanta, iyo in dareer loo lahaado arimaha jinsiga iyo qalab lagu cabiro sinaan la'aanta jinsiga ee siyaadaha iyo barnaamijyada. 30kii Juun, Golaha Culumadda Soomaaliyeed ayaa ku cambaareeyay siyaasadda cusub in ay tahay mid ka soo horjeedo islaamka, waxa ayna dalbadeen in la ciqaabo kuwa soo qoray. Juun iyo Julaa, wasaariika haweenka, xaquuqul insaanka, iyo horumarinta bulshada, haweeneeyda kaliya ee ku jirta golaha wasiirada, ayaa la soo sheegay in ay ka heshay dhowr hanjabaadood oo lagu dilayo kooxo islaamiyiin ah ee xag jira, iyaga oo ku eedeeyay in ay riixeeysay matalaada haweenka gudaha xakuumadda. 2dii Oktoobar Golaha Diinta Soomaaliyeed waxa ay sii daayeen warsaxaafadeed uga digaya dowlada in ay u ololeeyaan haweenku in ay soo galaan siyaasadda, iyagoo ee sheegay in qoondada 30 boqolkiiba ee haweenka laga siiyay

baarlamaanka ay tahay ‘‘mid khatar ah’’, kana soo horjeeda mabaadiida diinta islaamka iyagoo saadaaliyay siyaasadani in ay horseedi karto in qoysaku ay burburaan.

Ragga oo kaliya ayaa maamula shareecada, taasoo inta badan loo adeegsado danaha ragga. Sida ay qabto shareecada iyo hab dhaqameedka diyada, qof kasta oo lagu helay dilka haween waxaa qoyska dhibanaha la siinayay kala bar intii ay aheyd in laga bixiyo dilka ragga.

Inkasta oo sharcigu dhigayaa in shaqooyinka isku midka ha laga bixiyo mushaar isku mid ah, tani ma ahayn mid marwalba dhacda. Dumar waa ay ku yar yihiin shaqaalaha dawladda iyo kuwa gaarka ah sababtoo ah xeerarka dhaqanka iyo heerka waxbarashada gabdhaha. Dumarku laguma takoorin in ay yeeshaan ama maareeyaan ganacsiga, marka laga reebo dhulka ay Al-Shabaab gacanta ku heyso. Inkasta oo ay guud ahaan ka muuqdeen ganacsiyada yar yar, haweenka waxa loo dhiibay xilal hoose gudaha shirkadaha waaweyn.

Faqquqa haweenka waxaa si badan looga dhawaaqay degaanada ay al-Shabaab gacanta ku heysay. Iyadoo loo arkayay ka qeb qaadashada haweenka ee arimaha dhaqaalaha ay tahay mid ka soo horjeeda islaamka.

Inkastoo sharciga rasmiga ah iyo shareecadu ay u siiyaan xaqa ay dumarku u leeyihiin in ay yeelan karaan hanti una bixin karaan hantidooda si madaxbanaan hadana caqabado kala duwan oo sharci, dhaqan iyo bulsho ayaa inta badan ka horistaaga haweenku in ay isticmaalaan xaqaas. Sharci ahaan gabdhaha iyo dumarku waxa ay dhaxal u heli karaan kala bar dhaxalka uu xaqa ay helaan wiilasha la dhashay. Warbixin ay 2010kii soo saareen ururka haweenka ee Somaliland waxa ay ku sheegeen in 75 boqolkiiba haweenku aanay xoolo, dhul iyo hanti kalaba aanay laheyn. Kaliya 15 ilaa 20 boqolkiiba ayaa dhaxalka raggu wax ka siiyaan.

Caruurta

Diiwaan Gelinta Dhalashada: Dastuurka federaalka ku meel gaar ah waxa uu dhigayaa in ay jirto hal dhalasho oo Soomaalinimo ah isagoo ku baaqaya in la sameeyo sharci gaar ah oo qeexaya sida lagu qaato, lagaaga qaadi karo ama lagu waayi karo. Sanadka dhamaadkiisii, baarlamaanku ma aanu gudbin sharciyadaas.

Sida laga soo xigtay tirakoobka UNICEF ee 2005-2012kii, masuuliyiintu waxa ay diiwan geliyeen 3 boqolkiiba caruurta dhalata. Masuuliyiinta Puntland, konfurta iyo gobolada dhexe ma diiwaan geliyaan dhalashada caruurta. Caruurta ku dhalata isbitaalada iyo guryaha Somaliland ayaa la diiwaan galiyay, laakiin awooda oo kooban oo ay raacday hab nololeedka miyiga ayaa sabab u noqday in tiro badan oo ku dhalatay gobolka aan la diiwaan galin. Intii lagu jiray 2014kii ayey UNICEF bilowday in ay dowlada Somaliland ka taageerto in la sameeyo habka diiwaan gelinta caruurta ee heer degmo. Sida uu sheegayo tirakoobkii ugu dambeysay, nidaamku waxa uu diiwaan galiyay 5,300 oo dhalasho ilaa Nofeember 2015; barnaamijka waxaa looga dan lahaa in lagu diiwaan galiyo qiyaastii 270,000 oo caruur ah. Diiwaan galin la'aanta caruurta marka ay dhashaan ma aanay keenin in loo diido adeegyada dadweynaha, sida waxbarashada.

Waxbarashada: Dastuurka ku meel gaarka ah waxa uu dhigayaa xaqa waxbarashada lacag la'aan ah ilaa dugsiya sare, laakiin marna ma aheyn mid lacag la'aan ah, khasab ah, ama mid la wada heli karo. Baahida waxbarashada waxaa qeyb ahaan daboolay machadyo aan isku xirneyn, oo ay ka mid yihiin nidaamka Dugsiyada Quraanka; iskuulada dhexe iyo sare oo bulshadu ay maalgeliso, deeq bixiyayaasha dibada, iyo maamulada Somaliland iyo Puntland; hay'adaha samafalka ee Islaamka waxay leeyihiin dugsiyo iyo dugsiyo hoose iyo sare oo si gaar ah loo maamulo iyo machadyada tababar xirfadeedka. Meelo badan caruurta ma helin fursadda waxbarasho oo aan ka aheyn madrasaadka. Tirada gabdhaha ee dugsiyada dhigata waxa ay aheyn mid ka hoosesysa tan wiilasha.

Xadgudubka Caruurta: Xadgudubka iyo kufsiga caruurta loo geysto waxa ay aheeyeen dhibaato weyn, inkasta oo la helin tirakoob noocaas ah oo muujinaya sida ay u baahsantahay. Ma jiro dadaal la ogsoon yahay oo dowladda iyo maamul goboleedyadu ay wax kaga qabanayaan xadgudubka caruurta. Caruurta waxa ay aheeyeen dhibanayaasha ugu badan ee rabshadaha bulsho ee sii socda.

Habka "caasi waalid" oo waalidiintu ku xareeyaan caruurtooda dugsiyada lagu xaroodo iyo machadyo kale iyo mararka qaarkood xabsi iyadoo ujeedadu tahay in lagu edbiyo iyadoo aan la marin hab sharci ah ayaa lagu eedeeyay in ay ka jirtay meelo badan oo waddanka ah.

Guurka Yaraanta iyo Kan La isku Qasbo: Dastuurka ku meel gaarka ah ee faderaalku waxa uu waajib ka dhigayaa in labada is guursaneysa in ay gaaraan 'da'da biseylka' waxa uuna u qeexayaa caruur qofka ay da'diisu ka yartahay 18 sano jir. Waxa uu tilmaamay in si guurku sharci u noqdo in ay tahay in ninka iyo

naagtu ay labaduba si xor ah u ogolaadaan. Guurka yaraanta la isku guursadaa waa mid marar badan dhaca; 45 boqolkiiba dumarka da'doodu u dhaxeeyso 20 ilaa 24 waxa ayu ku guursadeen 18 jir halka 8 boqolkiiba ay ku guursadeen 15 jir. Dhulka baadiyaha ah waalidiintu waxa ay ku qasbaan gabdhaha in ay guursadaan ilaa 12 jirka. Dhulka ay gacanta ku heyso Al Shabaab, guurka qasabka ah ee la soo abaabulay oo u dhaxeeya askartooda iyo gabdhaha yaryar waana hab loo adeegsaday guurka qaab lagu soo jiito oo la isku qorto. Ma jiro dadaal la ogsoon yahay oo dowladda iyo maamul goboleedyadu ay kaga hortagayaan guurka yaraanta lagu guursado ama khasabka ah.

Gudniinka Fircooniga/Googoynta (FGM/C) : Eeg macluumaadka gabdhaha ka yar 18 ee qeybta dumarka ee kor ku qoran.

Caruurta oo Galmo looga faa'iideysto : Caruurta oo jirkooda laga ganacsata waa mid sharci daro ah dhamaan gobolada. Ma jiro sharciyo ka degsan kufsiga da'da iyo da'da ugu yar ee galmada aan raaliga la isaga aheyn. Sharcigu si cad ugama hadlayo mamnuucida sawirada galmada ee caruurta. Sharciyada ka faa'iideysiga galmada marar dhif ah ayaa la dhaqan geliyaa, ka faa'iideysiga noocaan ah waxaa la soo sheegay in uu yahay mid soo noqnoqda.

Caruurta Loo Qorto Askarta: Caruurta oo ciidamada loo qorto waa dhibaato weli taagan (eeg qeybta 1.g).

Caruurta Soo Barakaca: Waxaa jira tiro badan oo barakacayaal gudaha ah iyo caruur ku nool kana shaqeeyay wadooyinka.

Qafaalashada Caruurta ee Caalamiga ah: Wadanku xubin kama aha Axdigii Hague ee 1980 ee dhinaca Madaniga ee Qafaalashada Caruurta ee Caalamiga ah. Eeg Warbixinta Sanadlaha ah ee Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee Waalidiinta Qafaasha Caruurtooda travel.state.gov/content/childabduction/en/legal/compliance.html.

Yuhuud Naceeybka:

Ma jiro mujtamac la ogsoon yahay oo Yuhuud ah, mana jiraan warbixino sheegay falal la xiriira Yuhuud naceeyb.

Tahriibinta

Eeg warbixinta Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee dadka la tahriibiyo ee www.state.gov/j/tip/rls/tiprpt/.

Dadka Naafada Ah

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu siiyaa dadka naafada xaquuq siman sharciga hortiiisa waxa uuna ka mamnuucayaa dowlada in ay takoorto. Masuulyiinu ma aany dhaqan galin qodobadaas. Dastuurka ku meel gaarka ah ma cadeyn hadii qodobkaani uu khuseeyo dadka jirka naafada ka ah, caqliga dhiman, maskaxda ka xanuunsan, ama dareenka naafada ka ah. Kama hadlayo takoorka ay sameeyaan dadka aan dowlada ka tirsaneyn oo ay ka mid yihiin kuwa la xariira shaqaaleynta, waxbarashada, safarka diyaaradaha iyo gaadiidka kale ama arimaha la xiriira daryeelka caafimaadka. Sharcigu waajib kama dhigayo u sahlida gelitaanka dhismayaasha, macluumaadka ama isgaarsiinta ee dadka naafada ah.

Sida badan baahida badi dadka naafada ah waxba lagama qaban. Warbixin uu soo saaray Ururka Caafimaadka Aduunka (WHO) iyo Hay'adda Horumarinta Caalamiga ah ee Sweden (SIDA) waxa ay ku qiyaaseen in 15 boqolkiiba ay dadku qabaan naafo jireed. 2011kii waxa ay SIDA ogaatay in 25 boqolkiiba ay dhismayaashu ahaayeen kuwa u sameysan in lagu geli karo gaariga naafada laakiin aanu jirin gaadiid dadweyne lagu isticmaali karo kursiga dadka naafada ah.

Sida ay sheegtay Amnesty International dadka naafada ay maalin walba ay la kulmaan xadgudubyo xaquuqda bini'aadamka ah, sida dilka sharci darada ah, rabshadaha oo kufsigu ka mid yahay iyo noocyada kale ee galmoodka rabshadaha wata, xoog looga saaro guryaha, helitaan la'aan daryeel caafimaad iyo nolol heerkedu haboonyahay. Rabshadaha qoyska iyo guurka khasabka ah waxa ay ahaayeen arimo baahsan kaas oo saameeyay dadka naafada ah. Gabdhaha iyo dumarka naafada ah oo ay soo wajahday khatar ah kufsi iyo noocyada kala duwan ee galmoodka rabshadaha wata, sida badan dadka geystay oo aan cadaalad la marin taasoo ay ugu wacan tahay in loo arko in dadka naafadaahi ay culeys ku yihiin qoysaskooda ama qiimahoodu ka yaryahay dadka oo sidaas darteedna loogu xadgudbi karo.

Dhowr NGO oo ka howl gala gudaha Somaliland ayaa adeeg u fidiya dadka naafada ah iyagoo sheegay in qaar ka mid ah la takooro, laguna xadgudbo. NGOyadaasi waxa sheegeen in dadka madaxa iyo jirka ka curyaansan ay la

kulmaan takoor baahsan ayna aheyd caadi iyo wax bulshadu ay raali ka tahay in ardayda dugsiyada ee aan curyaanka aheyn ay garaacaan ardayda naafada ah.

Iyadoo aanay jirin kaabayaal adeeg caafimaad ee dadweyne, adeegyo kooban ayaa jiray oo siiya taageero ama waxbarasho dadka qaba curyaanimada xagga maskaxda ah. Wax caadi ah ayeey aheyd in dadka noocaas ah geedaha lagu katiinadeeyay ama guryahooda lagu xayiray.

Ururada maxaliga ah ayaa u dooday xuquuqda dadka naafada ah iyagoo taageero liidata ka helo masuuliyiinta maxaliga ah.

Qaramada/Qowmiyadda /Jinsiyada Laga Tiro Badan Yahay

In ka badan 85 boqolkiiba dadku waa kuwa wadaaga asal isku mid ah, diin iyo saameeynta dhaqan reer guuraanimu. Badi degaanada qabiilada degaanka ku badan ayaa ka reeba kuwa ka tirsan kooxaha kale in ay si waxtar leh uga qeyb qaataan hayadaha dowlada iyaga oo u geeysta faquuq xagga shaqaaleeynta ah, nidaamka cadaaladda iyo helitaanka adeegga dadweynaha.

Kooxaha laga tiro badan yahay waxaa ka mid ah Jareerta (kooxda ugu tirada badan dadka laga tiro badan yahay), Banadiri, Reer Xamar, Barawaani, Sawaaxili, Tumaal, Yibir, Yaxar, Madhibaan, Hawrarsame, Muse Dheryo, Faqayacquub, iyo Gabooyaha. Dadka laga tirada badan yahay, inta badan ma laha maleeshiyo hubeysan, waxaan sii socotay in si aan isu dheeli tireyn loogu geysto dil, jir dil, kufsi, afduub lacageed, laga bililiqeystay dhul iyo hanti iyadoo aan cadalad la horkeeninn garabyada maleeshiyaadka iyo xubnaha qabiilda waaweyn. Inta badan dawladda dhexe iyo maamul goboleedyadu way ka caga jiidaan. Qaar badan oo ka mid ah dadka laga tirada badan yahay waxa ay ku noolaayeen faqri aad u qoto dheer iyagoo la dhibaatooday noocyo badan oo takoor iyo gooni u sooc ah.

Wakiilada dadka laga tirada badan yahay ee baarlamaanka federaalka waxaa bartilmaameedsaday rag aan la aqoon, kaasoo xubnaha qabaa'ilada laga tiro badanyahay ay ku eedeeyaan in ay lacag soo siiyeen qabiilada waaweyn. Soomaalida soo laabaneysa iyo barakacayaasha gudaha ee ka soo jeeda qabaa'ilada yar yar waxaa ku dhacay takoor, bacdamaa sida badan ayan laheyn xiriir qabiilada xoogga leh iyo cid dhowrta.

Dagaalada u dhexeeya qabiilada ayaa dhaliyay dhimasho iyo dhaawac. Tusaale ahaan, gudaha Hiiraan waxaa lagu dilay 16 rayid ah iyo 28 kale oo lagu dhaawacay

dagaalo soo noqnoqday oo u dhaxeeyay Gaaljecel iyo Jajeele gudaha Baladweyne iyo tuulooyinka ku yaala meelaha baadiyaha ah. 5tii Sebtember, ugu yaraan 15 qof ayaa lagu dilay in kabadan 40 tana waa lagu dhaawacay dagaal u dhaxeeyay Sacad iyo Saleemaan ee qabiilka Hawiye iyo jilibka Cumar Maxamuud ee Daarood meelaha baadiyaha ah ee bariga Gaalkacyo magaalo ka tirsan Gobolka Mudug. Gudaha Shabeelada Hoose, dagaalo u dhaxeeyay jilibiyada Habargidir iyo Biyomaal ayaa keenay dhimashada 28 rayid ah intii lagu jiray sanadka.

Dhimashada ka dhalatay isku dhac bishii Juulaay 2015ka ee u dhaxeeyay qabiilada Dhulbahante iyo Habar Yuunis ee tuulada Guumeys, ee Somaliland, bishii waxaa la xaliyay intii sanadka iyada la kala qaatay diyo.

Falalka Rabshadaha, Takoorka, iyo Xadgudubyada kale ee Ku Saleysan fikirka Galmoodka iyo aqoonsiga Jinsiga.

Dadka isku jinsiga ah ee isu galmooda ciqaabtooda waa xarig u dhaxeeya laba bilood ilaa sadex sano. Sharcigu ma mamnuucayo takoorka ku saleysan fikirka galmoodka ama aqoonsiga jinsiga qofka. Bulshadu waxa ay u aragtaa fikirka galmoodka iyo aqoonsiga jinsiga qofka mowduucyo aan laga hadli karin mana jirin dood dadweyne oo ku saabsan takoorka ku saleysan fikirka xagga galmada iyo aqoonsiga jinsiga oo ka dhacday mid ka mid ah gobolada oo dhan. Ma jirin ururo la aqoonsan yahay oo ay leeyihiin LGBTI iyo warbixno ka hadlaya. Waxaa jira dhawr warbixinood oo ku saabsan rabshado bulsho ama takoor oo ku saleysnaa fakarka galmada ama aqoonsiga jinsiyadeed iyada oo ay sabab u aheyd ceebeynta xun ee bulsho ee fikirka galmoodka iyo aqoonsiga jinsiga oo ka hor istaagtay shaqsiyaadka LGBTI ah si cad u sheegaan fikirkooda galmo iyo aqoonsigooda jinsiga. Ma jirin talaabooyin la ogsoonyahay ee lagu baaray ama lagu ciqaabay kuwa gacan ka geysta xadgudubyagda. Sharciyada dambiyada naceybka ama habka cadaalada bulshada ma jirin qaab ay gacan uga geysteen maxkamdeeynta dambiyada ay eexdu dhiiri galisay ee looga soo horjeeday xubnaha bulsho LGBTI.

Ceebeynta Bulshada ee HIV and AIDS

Dadka qaba HIV/AIDS waxa ay ahaayeen kuwo wajahay takoor iyo xadgudub bulshadooda dhexdeeda iyo kuwa wax shaqaaleeya dhamaan gobolada oo dhan. Qaramada Midoobay ayaa sheegtay in dadka qaba HIV/AIDS ay la kulmaan xadgudubyo xagga jirka ah, qoysaskooda oo diida, iyo takoor goobaha shaqada ah iyo iyadoo shaqada laga eryo. Caruurta ay waalidkood qabaan HIV waxaa sidoo kale loo geystay takoor, taasoo hoos u dhigtay in ay helaan adeeg. Ma jirin jawaab

rasmi ah oo laga bixiyay takoorka noocaas ah.

Qeybta 7aad. Xuquuqda Shaqaalaha

a. Xoriyadda Ku Biiritaanka ururada iyo Gorgortanka Koox Ahaaneed

Dastuurka federalka ku meel gaarka ah waxa uu siinayaa shaqaale walba xaqqa uu u leeyahay in uu abuurdo kuna biiro ururada shaqaalaha in uu ka qeyb qaato dhaqdhaqaaqada ururada shaqaalaha, in uu sameeyo shaqo ka firiisada sharci ah iyo inuu ka qeyb qaato gorgortan wadajir ah. Mana jiro xadidaado gaar ah oo xagga sharciga ah oo xadidaaya xaquuqahaas. Sharcigu ma xadidayo heerka gorgortanka wadajirka ah. Dastuurka federaalka ku meel gaarka kama hadlo takoorka lid ku ah ururada shaqaalaha ama ama soo celinta shaqaalaha loo eraya howlo la xariira urur shaqaale. Badbaadinta sharcigu kama reebeyso koox gaar ah oo shaqaale ah. Inkasta ciqaabta ay ku jirto lix bilood oo xarig ah, taasoo ay umuuqato in ay keento si ku filan in ay uga weeciso, dowladu waxa ay la'dahay awood ay si wax ku ool ah ugu fuliso sharciyada khuseeya.

Bishii Nofeembar Gudiga Ururka Shaqaalaha Aduunka ee Xoriyadda Ururada ayaa ogolaaday cabasho ay soo gudbiyeen laba Urur Shaqaale Soomaaliyeed waxaana taageeray Ururka Isutaga Shaqaalaha Caalamiga. Ururka Shaqaalaha Aduunka (ILO) waxa ay dowlada ku boorisay in ay ka laabato faragalinta ururada gudahooda. Cabashadu waxa ay ku saabsaneed xad gudub lagu sameeyay Xaquuqa Axdigii Abaabulo iyo Gorgortanka wadajirka ah iyo Xoriyada iyo Axdiga Ilaalinta Xaqqa in La Abaabulo. Cabashadu waxa ay faahfaahisay xadgudubyo nadaamsan ee xoriyadda ururada iyo xaqqa ururada ganacsiga ee dowladda. Oo ay ku jirto in la waxyeeleeyo madaxbanaanida iyo sharciyada ururada ganacsiga. Iyo qashqashaada iyo handadida xubnaha ururada iyo hogaamiyayaashooda ee hey'adaha dowlada. Cabashadu waxa kale oo ay hoosta ka xariiqday sharciyada shaqaalaha ee dalka oo ah kuwa xiligoodii dhamaaday ayna cadeed in aanay si haboon u ilaalin karin xaqqa ururada shaqaalaha.

Dowlada iyo kuwa wax shaqaaleeya ma aanay ixtiraamin xoriyada ururada. Dowladu waxa ay si joogta ah usoo faragalisay howlaha ururada. Tusaale, ahaan dowladu waxa ay iskeed ugala noqotay ergadii Ururada Shaqaalaha Soomaaliyeed fasax in ay ka qeyb galaan bishii Juun 2015 ee Shirkaa Shaqaalaha Caalamiga.

b. Mamnuucidda Shaqaalaha xoogga ama Khasabka logu shaqeyo

Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu mamnuucaydaa is adoonsiga, xoog ku adeegsiga, in aan la tahriibin karin, ama aan lagu khasbi karin shaqo ujeeda kasta ha ahaatee. Masuuliyiintu si wax ku ool ah uma aanay dhaqan gelin sharcigan. Sida uu dhigayo xeerka ciqaabta ee ka horeeyey 1991dii. oo ah mid khuseeya dawladda dhexe iyo heerarka gobolada, ciqaabta adoonsigu waa xarig shan ilaa 20 sano ah. Ciqaabta xoog loogu shaqeysto qof waa lix bilood ilaa shan sano. Inkastoo ay ciqaabtu u eg tahay mid ku filan oo adag, marar dhif ah ayaa la isticmaalaa. Ma jirto dadaal la ogsoon yahay oo dawladdu u gashay ka hortaga iyo baabi'inta dadka xoogga loogu shaqeysto waddanka gudahiisa. Wasaaradda Shaqadu ma laheyn kormeerayaal mana aysan sameyn wax kormeer ah oo la xiriira xagga shaqada.

Dadka oo xoog loogu shaqeysto wey dhacday. Caruurta iyo qabiilada laga tirada badan yahay ayaa sida la soo sheegay loo isticmaalaa xamaalka si loo safriyo maandooriyaha heerka dhexe ee qaadka (ama miiraa); beeraha, xoola raacida, iyo dhagax jabinta iyo dhismaha. Caruurta oo ciidamada loo qorto waa dhibaato weli taagan (eeg qeybta 1.g). Al-Shabaab waxa ay dadka xeryahooda ku jira ku qasbaan in baadiyaha u guuraan, si ay ururka uga soo saaraan dalagyada lacagta lagu bedasho.

Eeg warbixinta Wasaaradda Arrimaha Dibedda ee tahriibinta *Dadka* ee www.state.gov/j/tip/rls/tiprpt/.

C. Mamnuucidda Ku Shaqeysiga Caruurta iyo Da'da ugu yar ee Shaqada

Ma aanay caddeyn haddii ay jirtay da'da ugu yar ee shaqada. Sharcigii shaqaalaha ee ka horeeyay 1991kii waxa uu mamnuucay caruurta oo lagu shaqeeyo, da'da shaqada ee uu yarna waxa ay aheyd 15 sano shaqada inteeda badan, iyada oo si gaar ah da'da ugu hooseysa ee ugu yar loo tilmaamay shaqooyinka waxyeelada leh waxa uuna mamnuucayaa kuwa ka yar 18 jirka in ay habeenkii ka shaqeeyaan warshadaha, ganacsiga iyo beeraha, marka laga reebo shaqada xubnaha qoyska. Daastuurka federaalka ku meel ah waxa uu dhigayaa "cunugna kama shaqeyn karaan ama ma bixin karaan adeeg aan ku habooneyn da'ada ilmaha ama khatar ku ah caafimaadka ilmaha iyo koritaanka ilmaha marnaba." Dastuurka federaalka ku meel gaarka ah waxa uu ku qeexayaa ilmo qof kasta oo da'diisu ka yar tahay 18 jir.

Wasaaradaha federaalka ee Shaqada, Haweenka, Iyo Horumarinta Xaquuqul Insaanka ayaa mas'uul ka ah dhaqan gelinta sharciyada shaqada ee caruurta. Hase yeeshee, wasaaradu ma aanay dhaqan gelin sharciyadaas. Qaar badan oo ka mid ah

sharciyada la xariira in ganacsi looga faa'iideysto caruurta waxa ay ku jireen sharciga ciqaabta ee 1962dii Sharciyadaasu kuma habooneyn in ay ka hortagaan caruurta oo lagu shaqeeyo, ganaaxyada baadankood waa la iska daycay sicir bararka dartiis. Dawladdu waxa ay ka qeyb gashay ololeyaal la doonayo in caruurta looga saaro ka qeyb galka iska horimaadyada hubeysan (eeg qeybta 1.g.).

Caruurta oo lagu shaqeeyo waxa ay aheyd mid baahsan. Caruurta oo loo qorto loona isticmaal askarta weli waxay ahayd dhibaato taagan. Dhalinyaradu waxa ay inta badan ka shaqeeyaan xoola raaca, beeraha iyo shaqada guriga iyagoo ku bilaaba da' yar. Caruurta dhagxaanta ayey u jajabiyaan jaay ahaan, waxa ayna ka shaqeeyeen in ay wadooyinka sigaar iyo qaad ku gadaan. UNICEF waxa ay ku qiyaastay 49 boqolkiiba caruurta da'doodu u dhaxeeyso shan ilaa iyo 14 jir in ay ahaayeen shaqaale mudadii u dhaxeeyso 2009 iyo 2015. Sidoo kale eeg warbixinta Wasaaradda Shaqada ee *Ogaanshaha Hababka Ugu Xun Ee Caruurta Loogu Shaqeeyo* ee www.dol.gov/ilab/reports/child-labor/findings/.

d. Takoorka la xiriira Shaqada iyo Xirfadaha

Sharciyada iyo xeerarka waxa ay mamnuuc ka dhigayaan takoorka ku saleysan qowmiyadda, jinsiga, naafanimada, aragtida siyaasadeed, midabka, luqadda, ama heerka bulshada, laakiin dowladdu si haboon uma aanay dhaqan gelin sharciyadaas iyo xeerarkaas. Sharciga shaqaaluhu waxa uu dhigayaa in mushaar siman shaqooyinka siman. Sida uu qabo sharciga shaqaalaha ee 1972, ciqaabta waxaa ku jira ilaa lix bilood oo xabsi ah iyo/ama ganaax aan ka badneyn 1,000 shilin oo Soomaali ah (waxa ka yar laba doolar). Ganaaxu ma aha mid ku fiiln inuu hor istaago jabinta sharciga. Sharcigu ma aha mid mamnuucaya takoorka ku dhisan diinta, da'da, asalka qofa, bulsh ahaan meesha uu ka soo jeedo, fakarka galmada, ama aqoonsiga jinsiyadeed ama xaaladda inuu qabo cudurka HIV ama cudurada kale ee la is qaadsiiyo.

e. Xaaladdo Shaqo oo la Aqbali Karo

Ma jiro da'da ugu yar ee shaqada ee qaranka. Sida laga soo xigtay Bangiga Aduunka, 52 boqolkiiba dadka oo lagu sameeyay Tirakoobka Hirarka Sare ee Mowjada Koowaad ayaa ku noolaa saboolnimo.

Sharciga shaqaaluhu waxa uu dhigayaa in todobaadka shaqo ee caadiga ah uu yahay 48 saacadood iyo ugu yaraan sagaal maalmood oo fasax qaran ah oo lacag la

siinayo iyo 15 maalmood oo fasax sanadeed ah, isagoo waajib ka dhigaya lacag dheeraad saacadaha dheeraadka ah ee shaqada kuna xadidaya 12 saacadood oo saacado dheeraad ah todobaadkii. Sharcigu waxa uu dajinayaa heerka caafimaadka shaqada iyo badbaadada. Sharcigu si gaar ah uma sheegayo hadii ay shaqaaluhu naftooda ka saari karaan xaalad khatar ku ah caafimaadka iyo amaankooda iyaga oo aan qalqiil shaqadooda.

Ma jirin dadaalo abaabulan oo lagula soconayo xaaladda shaqada. Wasaarada shaqada ayaa ugu xilsaarneyd heerka federaalka ah dhaqan galintiisa inkata oo aanu aheyn mid taabagal ah.

Mushaharka iyo xaaladdaha shaqo waxaa inta badan la sameeyaa iyada oo loo marayo hab ku saleysan dalabka iyo badeecada, iyo saameynta uu leeyahay qabiilka qofka shaqaalaha ah. Ma jirin wax macluumaad ah oo ku saabsan jiritaanka ama xaaladda shaqaalaha ajnabiga ama soo galootiga ah ee dalka gudihiisa. Shaqaalaha intooda badan waxa ay ka shaqeeyeen qeybo aan rasmi aheyn.

Masuuliyiintu ma ay laheyn awood ay si waxtar leh ugu dhowraan shaqaalaha rabay in ay naftooda ka saaraan xaalada khatar ku ah caafimaadkooda ama badqabkooda, inkasta oo aan kiisas noocaas ah aan la soo sheegin.